

TO: ANNARITA PUGLIELLI,  
WITH RESPECT.

*Alfred*

BAROOR-DIIQ

Gamuute Axmed Gamuute

Casar weeye ku gaaban. Curad la sheegaa kamuu hadhin maalintii. Way is hala-loobisay. Cadceeduna, kambalkay, goorahanba, kaga loohnayd, godkeeda. Haabashaa ka xigta.

Intaaney ku hooban se, daymo muquuna ah, inay xaggiyo Geeska, dib ugu soo qayraamisay, ayuu Sigad, mala-malaynta, isku tusay. Wuu hammiyay. Qorraxdoo, gayi tar-wadhay, oo tii u dambaysay ah, il raxmadeed ku tooyanaysa, dhaayahana, kal iyo laab, ugu hortay, baa humaag ku hor timi. Dareenkuu isna, u raari-ciyay. Cinddiguu uga kuur gelay. Qalbigana, wuu u ballaadhiyay.

.....

" Go' iyo maradaydi

baygu gubtay

Haadkaa gigay

guurtidaydi

Is gaabiye

gumaradaydi !

" Gacantii midig  
                     baa gurtii bidix  
 Warmaha kula gaastay  
                     oo gaw  
 Inay gam ka siiso  
                     yaw go'an !  
 Garaba, garabki —————  
                     xiguu ku gambiyay !  
 Guluf buu u lalabay  
                     ishii, gurux  
 Iyadoo galacalayn  
                     gondaha dhigay  
 Nabar buu u gilgilay  
                     galiilyada  
 Guduud ka milaalay  
                     gaawaha !  
 Galshadii u dhexaysay  
                     laga guur  
 Fiintoo gedef  
                     guudka lagu xidho  
 Ganbadii sare  
                     geed ku laashayo  
 'Guryaa ba'ay  
                     oo galaan-gala !'  
 Gadiidka ku oyda  
                     iyo galaw

"'Aabahay gablan'

gura gudoodiga,

Galaydh iyo bahal

ku gaardiye !

Col gaba-gabo

gawrac, iyo gamas

Ganataa ka kulaasha

goonyaha !

Gaadaa mara

goor-xun-yeedhada !

Is gaba-ware

dhaayihii gacal !

Biyaa iigu gelay

godkaygi

Go'aye, tolow

yay gunaanada ! " Dal-

weynihii oo ku neef-guraya; oo Gadhkii,

" Dakharkii horoon

La dawayninoo .

Intuu sii darsaday

Milil daacayoo

La daroorayoo

Caabuqu ka da'o !

Oon daanadiyo

Doogtii la dhayin ,

Dar Allee misana

" Dibin-daabo iyo  
 Daan-daansi kale  
 Daaraan irmaan  
 Iyo dacar hurgumo  
 In danqaabo iyo  
 Digashiyo badheedh  
 Loo daro shantoo  
 Damaq iyo xanuun  
 Iyo duudsi jeer  
 Danbar layga dhigo  
 Maxaa igu dirqiyay?!

Daayin baa arkee  
 Mar i dage, ha dago !  
 Doqoniimo iyo  
 Anna dala'si kale  
 Iyo daramal baas  
 Oo sidi doraad  
 Laygu duur-xuliyo  
 Mar i dage, inuu  
 Mar labaad i dago  
 Waan diidayoo  
 Dib u yeeli maa !  
 Ku dalaaqanoo  
 Anigiyo Doc-joog  
 Dumarkayo, ku furan !

"Anaa duubka iyo  
 Shaalkiyo duntaba  
 Gaar u daaqsadiyo  
 Anaa duubinimo  
 Isu doortayoo  
 Ku dangiigsadiyo  
 Dawlaba anay  
 Ii doonantoo  
 Laygu ma damcib  
 Maantana dumaal  
 Iyo dadab-gelkeed  
 Lihi dumaashiday !  
 Digta reemihiyo  
 Kaga dananintana  
 Daadaa taqaan !  
 Adna duluglahow  
 Sacab diirran iyo  
 Kugu daawashada ! '  
 Bal danaanigaa  
 Iyo duul Allow  
 Shuqulkaa dellegan  
 Gabalkii dumiyo  
 Waa daalacaba  
 U dul-qaado iyo  
 Dulli qaayiboo  
 Ha digiigixane  
 Daba-gelis ahaw  
 Maxaa igu dirqiyay?! "

" Dayaw iyo haduu  
 Eebahay dufkii  
 Iga doojiyoon  
 Galabtaba dalkii,  
 Dudadaan lahaa  
 Dulkay iga xigtiyo  
 Xagi degel-sankii  
 Ma dakaame faras  
 U dul-laalayoon,

Doolaaladii  
 Dariiqaan ku imi  
 Dib u guray qajeel,

Oon kaa dan baxay,  
 Dibed kaa maroon  
 Kugu idhi, ' I daa ! '

' Oo daalac iyo  
 Waxaan deyn lahaa  
 Waan daadiyee

Dirham yaan heline  
 Inaan kaa durkaan  
 Door moodayoo

Adiguna dulaad  
 Iska degashataad  
 Meelaha ka dayan ! '

' Aniguna degtaad  
 I daloolisaan  
 Duug-duugi, 'idhi

Kuna daray!Dundumo  
 Ku dareemayoo  
 Kuma soo dugsado ! !

" Daw baan hadloon  
 Ku daliiliyee  
 Diidow, dilaac ! " intuu ganafka ku mar-  
 ooriyay, uu gafuurkii, mejaa ula dhiladay;  
 Daabkana," Hadaye, Degdegow

dabkaa be'

Aday dardaraye

dabkaa be'

Durduradaadii

dabkaa be'

Digiyo naar bay

dabkaa be'

Daf igu siisayo

dabkaa be'

I deebisayee

dabkaa be' !

Hadaye, Damacow

dabkaa be'

Aday daldalayo

dabkaa be'

I yidhi dagan qaad

dabkaa be'

Qab iyo dabinkaba

dabkaa be'

Aday deday oo

dabkaa be'

Daluun igu riday

dabkaa be' !

Hadaye, Duniyey

dabkaa be'

Dushaada habeen

dabkaa be'

Kumaan doogsane

dabkaa be'

Daruurtaaduna

dabkaa be'



" Waxay dihaataa  
dabkaa be'

Dakane weeyaan

dabkaa be' ! " ay weli, dan-  
baaburadu , kaga duulayso, ayay cadceedu,  
indhaha, ku waraysatay. Waraaqiisii baa aad  
u beer-qaaday. Jidhiidhico, naxariiseed baa  
ugu jabtay. Dhabankay, xaggiisii, u soo dadab-  
tay. Cukaartana, way u soo laalaadisay:

—" Geesyow kafadiyo

kor yaal naxash

Kulankeenna kan xiga

inaad koran

Amaad kalwan

Kaahinkaa garan,

Waxaad kohan

soo kabaalee

Dhegtaan kugu kaalin

soo koob ? "

—"Kalmadii sami

hadalba waa kole

Koosaar iyo

koron-kor geeda le

La mood kumbis

sixin dhex kuududa !

Iyadoon kartidaadu

kuusnayn

Kanigaagu garrayn

kifaax gabay

Kooruhu kula meeray

oo kaxa,

Baroor diiqdu Kaaha

waa kaal

Hub kaalma a

hiillo kaamila

Maalintii kashif

kaalin kuu gela

Ku kaaba markaad

kambalan tahay ! "

Warrantoo kelyaa  
 i kaafiday  
 Qalbigaa ka kashbacay  
 kor joogsiga,  
 Abaalkaagu Kaaha  
 waa kayd  
 Kashayda ku sugan  
 karaamadu ! "

" Qodobkaa kor-dhabaye  
 bal kow, i dhe  
 Sidaan kalax daray  
 on geeri kabaday  
 Hurgumo kanfaftiyo  
 sun iyo kulan  
 Intaan kurus  
 mooday kawraray  
 Afkaa ku kakabay  
 kobtaa dhigay,  
 Aniga laygu kulan  
 la ii koodh  
 Kaalufkaan arkay  
 Kaaha waa yaab ! "

" Kar baa dhacay  
 oo kulaylkii  
 Kataan rogatiyo  
 kaliil ugub  
 Kaad buu la yimiye  
 bal kaalaya !  
 Karaar jabi waaye  
 kaalaya !  
 Karkaaradi jiidhye  
 kaalaya !  
 Wuu sii kordhayaaye  
 kaalaya !! "

Anoo la karsamay  
 kurbadi hore  
 Hilbahayga la kacay  
 dab kuunyaday

" Xanuun i kawiray  
     la soo kogay  
 Kun-facay dhamac  
     looga dhigay kaw! !

Cadaab kari  
     oo kurkaa mari  
 Sidii karadh  
     soo kadaaliyi,  
 Iyadoo la kilkilay  
     nac sii koray  
 Kanooni qarxiyo  
     hed iyo kaw  
 Kalyaha laga saaray  
     keena la'  
 Kamiin olalaysa  
     kaafirad,  
 Hadana kumbadaydaye  
     bal kaalaya !  
 Kadeedka adduun  
     bal kaalaya !  
 Kulyoon ani  
     naar la ii katib  
 Kiiskan gelay  
     Kaaha ii sheeg ?! "

— "Geesyow, **kan**badhuudha  
     karin hoog  
 Kor iyo iilku  
     waaba kala kaan  
 Adaa kaxarray  
     ku kimis go'ay  
 Kuur-kuursaday  
     kaabadii dhexe !

Taladii karkabiyo  
     kadliyo orad  
 Fudayd lagu kuro  
     dhib keentaye,  
 Hadaan kasmaday  
     la kaashaday

" U kuur-gelay  
kololo'aagani,

Qabyaalad kash-kaash le  
iyo kaman

Ideed kibirtoo  
katiinad leh

Kacaanimo iyo  
kamaandayn

Kolkay kala-dheeri  
iyo kaaf

Kalahii la arkaba  
la timi kiti

'Anaa kana  
kabaha ii qaad'

Kalaam iyo weger  
ka-waaweyn !!

Ayaad kardhashada  
si kadisa a

Qabyaalad kufkeeda  
oo kale

Ku kaakicisood  
ku tidhi, 'La kor !'

Waxay is kidfaamba  
lays la kuf

Kadmoo raqihii  
is kadab jare !

Ma kaadsade  
keep la yuururay

Kadinkii xigay  
kaga kabaal qaad

Kuraygu kula  
yaace kuraygii !

Kadeed ka guroo  
kadeed uga guro

Waxaad kasbataaba  
waa kaar !!

" Kubkaad ka jabtoo  
                   kariirta a  
 Adoon kaban  
                   lagu kaynaan !

Kud iyo cirir  
                   kuu kaltame jeer  
 Kolkii midba adi  
                   kawaan ku dhig !

Bidaar kalax  
                   kiish la heerimay  
 Kuuligii qaatay  
                   koornigii beri  
 Kaabulkii shalay  
                   iyo'karaaniba  
 Adaa isu kaday  
                   kulaambay !!! "

Kala gaadhay, intaasi.Sigadna, ka-sidii,  
 xaggooduu ku cindanaa.Iyagay, laabtiisu, la  
 jirtay.Nabdiguu, kala mayracanayay.

-II-

Xeradii Faqash, looga hadhay, iyo lama-  
 gelaadii, baa la joogaa.Dhufayskeedu, wareeg,  
 iyo waa nin joogii.Cagaf, baa qoday.Qalcad adag,  
 ayay ahaan jirtay.Laga ma gurin, miinadii.Sidii  
 bay ugu giraansan tahay.

Halkan, kaare, afar iyo sodonle ah, ayaa  
 ka qoor diinlaynaya.Gacankii maroodiga, iyo isku  
 fadhigiisii, ayuun buu la soo jeedaa.Dhulkuu  
 ku aasan yahay.Dhafoor-qiiqle, Jeemisa, baa hal-  
 keer, gorofsan.Shilkaa, saaraan jiray.Xaggan iyo  
 bidixdiisana, luga-badanihii taangiyada, la ab-  
 raari jiray, baa baraaqa.Ciidduu, labiyo tobankii  
 daaweba, ku qaniinsan yahay...

Intii qaadmi wayday,iyo qalfoof baa ka hadhay.

Liiq dhig weeye cadceeduna.Way ka hadaafay.  
Balbatayoo, galbeed iyo godankeedii bay ka haybsa-  
tay.Duleedkay,dhawaalaba,kaga sii dhignayd.Gabal  
laysu rogiyo god-gelkeedaa, is xigi.

Dhiciisayooba se, way ka madoobayd,Sigad.Weji  
guntan, ooy murugo ku hagoogan tahay,ayuu lahaa.

"Salaadi ma daynay  
Sumaci ma sifaynay  
Safaynki coloobay  
Sidiisi ma yeelay!"

Subaxi Alle keeno  
Sulubka ku rigeeya, iyo gomod  
raamsigiisuu la tifmay.Wansiixeedaa dilay.Halistuu  
ka warwwmay.Niyaddaa mudnayd.Walbahaar baa la tegay.  
Shalay wuu ogaa.Arag, maantana.Umal iyo urugaa isu  
dhiibay.Huq baa degeshatay.Oofahay, isaga booday.  
Saableydaba, iniin iyo abur bay ka dhigay.

"Shantuu Saatirkaygu  
Lahaaye i siiyay  
Kuwuu sabarkayga  
So'diisa ka beeray  
Sadkii wadnahayga  
Siraadki naftayda  
Sam bay ka dhigeeno  
Mugdaa igu soogan,  
Walaal iyo sayba  
Anaa ka saboolay  
Sokeeye ka hoogay  
Somaali ku hoogay!"

Nabada ku sahaysa  
Salaw olalaysa,

" Saqaafka colaada  
Belada sun-sumaysa  
Sugaaglaha waashay  
Sabaaniyadiisa,  
Xaraanka sadaada  
Salaad walba dhiigga  
Warmaa samaydooda  
Sidaa uga leefa,

" Dhaleeyada soodhku  
 Dhexdooda ka siibtay  
 Hilbaa kala seermay  
 Magligu kala soocay  
 Halbawlaha saydhmay  
 Saliilyada taagan,  
 Anuu samaddeeda  
 Dhidhkiyo saxalkeeda  
 Subaac-nimadeeda  
 Jidhkaygu la suuqmay  
 Dareenkuna suuxdin  
 Ka qaaday sunteeda,"

Sabaanka ku awle

In hadu silsilayso....

siduu weerkiyo baroorta, ula wadaagayo, caloosh-  
 na uga hiqlaynaayo, ayay-maalini dhaqaaqdaa. ...  
 Eedaad buu ku maalingaalaa. Uur-ku-taalana wuu ku  
 gabal dhacsadaa.

Isagoo dhan-qalan, oo aanay dhannaba kaga  
 jirin, ayuu sidaa u ciiraa. 'Aaa!Maalin baastii  
 naf igaga may tegin!Ma nooli !Meel far la saar-  
 ana ma lihi!Waabâ laygu dhan yahay!Oooh!Dhimaad  
 baan ahay!Budh in layla dhacay, ayaad moodaa!'   
 iyo, 'Dhintaye, tolow yayga dhagar gelay?!' ayay  
 xubnihiisuna ka-wareegaan. Uubatayn bay iskala  
 soo hor-jeedsadaan. Gocashaday, mid waliba ku uug-  
 aantaa. Taahay, isugu jiibiyaan.

Habeenkiyo maalintuna, isu ma dhaamaan.  
 U kala-dhig weeyaan. Kud buu ka guuray. Qanjuu se  
 uga guuray. Laba kala daran, ayuun buu isaga goo-  
 shay. Dhinacuu dhigay, inuu mahadiyana lali. Gog-  
 oshaaba ku dikata. Guul-guul kulul bay u saarsaar-  
 ta:" Inaan oday fiigin  
 Abaydin la dhaafin  
 Ahaan kari mayso  
 Ahaan kari mayso !

Kulyoon ubaxeena  
 In loo jaro ooda  
 Ahaan kari mayso

" Ahaan kari mayso !

Allayl iyo maalin  
Agoontu ha oydo  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

Dadkeenaba aake  
Inuu ka adeego  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

Ayaan walba aarsi  
Ugaadhsi, ha joogo  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

Inuu arligeennu  
Asay ku abaado  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

Alhuugo ka oogsu  
Alhuumo ku eero  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

' Urtuu ku gelaayē  
Ha leo dilo-aano  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

Aguuga, aguuga  
Xabaal ku ekaada  
Ahaan kari mayso  
Ahaan kari mayso !

" ayayba kula oogsataa.  
Nabddigay ka buuxsataa. Way kaga adintaa. Habeen-  
kuna galgalasho, geesna qaban waa, iyo gama'aan-  
hurdo-ahayn ayuu ugu gabaabsiyaa. Guhaad buu ugu  
dhammaadaa.

Alla magane Sigad, siday u dheelidayba



way ka siloonayd. Dhulkay ka taallay. Galabtiyo sheekadeeduna uga may rayn. Wayba uga dartay. Dhuudha-casay ku jaftay. Xusuus iyo dulinkeed bay ku carisay. Arami bay ku kaakicisay. Carcar horlay iyana kula soo aartay. Hamuun bay kula dhacaday. Takar baa ku dhabatay.

Waa sida, oo Sigad way ka cilaalayd. Cirkaa geeliisa lagu maalayay. Susuki aan kolkeeda horaba quud ahayn, oo kolkee qoorta la gooyay ee la saaray qorina, sii hagaastay, oo kab shaydaan u ekaatay, eeggana ragaadsan oo candhada ku haysa dhulka, ayuu dheegga kaga tiirsanaa. Gadhkuu kolba, gacanta midig ku baaqbaaqayay. Wejiguu uruurinayay. Xirrib-ahaa isku soohnaa. Shaarubtuu hadba, miqayay. Labadii Jangal ee dushiisa ku cadaaday, kabihi Qadha hool-hoolan ahaa, iyo intuu ku soo jabhadeeyay buu sitay. Iska muu dhigan. Dhammahay 279 u ahayd baadi soocda, badhkana 'S'-adu kaga maddanaysnayd, oo uu bawdada u barkiyay, ayuu cudha, bidixda kaga taataabanayay. Laba qafis, oo sodon iyo sodon, lix-dankaa af-casta ah, la kala jeestay, baa ugu taagnaa. Cinjir madaw. ayuu okhliyada isku oggolaysiiyay. Maydhax sideed buu ugu saddexa maray. Timuhu hoolif. Hamashkuu dhigay gadhku. Waa hore ayay labadaba cirradu ka saameeshay. Indhahoo xinjir ku galgalimaystay baa ka soo maqnaa. Intaana Shiduu 'Hii'-da taahu ku lammaan yahay, kaga gurayay warka.

--III--

"Shinkastoy labaduba, Tafa-dhiigyo ku sheegan yihiin, hadana tii xaggiina ka dhacday baa, tan lagu timi ka caqlaanisanayd. Isu ma dhawa. Ay sababtu tahay, ardaayuuba, Laan-kuruusarka baasi, docdiinaa ku dhex maray. Lihi iyo xaqlenimaa dhinac waday. Ka kalana, xabbaduu faqash kaga meersaday iyo xinjirtii kaga bururtay baa u sii cadayd. Waa la kala war la'aa. Qolaba teedaa u muuqatay. Kala maan baa la ahaa. Sideedna waa laysugu lumay.

" Taayaduse waa gaw  
Iyo gebiyo soo dumay!

Guba iyo Hengela dhiga  
Iyo tii Gar-yaabley  
Iyadaa ka geed ba'an  
Ardaa gudihi weeyaan!

Gonda-gooyayaal iyo  
Ilma Gaanya-waranley  
Gunti-dhiiglayaashii  
Iyadaa ka gaws kulul  
Ardaa gudihi weeyaan,  
Guri daahu soo go'ay!" intuu Shide ku reemay  
ayuu dhulkuu xarriiqayay, kor uga soo toosay.

In shaacii madoobaaday, ooy maalini shiraaca-  
tay, habeense weli yahay, oo hiimse-hiimse baqaliyo  
hiimamow ay tahay, ayuu dhaaday. Go'ii shaalka ahaa  
ee uu ku doonyaysnaa buu iska furay. Candha-laabkii  
uu labada lugood dhexdooda ku haystayna, baadkii  
birta ahaa, buu u fidiyay. Dhabtuu saartay. Kuurkuur-  
si iyo xabeeb tirashuu, kolkaa isku daray.

"Iyo si-dalagtay noo la kacday!" intuu carrab-  
ka ku xejyay, oo gaadada qoomamo la dededbay, ayuu  
hakad dabadii, raaciyay," Miino jalfis iyo joogsiba  
ku dhagaraysan, qarxiyaheeduna aad dhega fudud yah-  
ay, baannu damanaantayada iska 'Daf' nidhi. Mabaan-  
aan hadin. Cagtaannu iskaga ballaadhinay. Iyana taa-  
bashayba u baahnayd!"

Mugdi baa mujaahidiintii isku soo waabay.  
Higil madaw buu gaafaha kaga meeriyay. Hiishuu  
kaga dhigay. Habeen bay noqotay. Halkan, halkeer,  
halkoo, iyo hareerahaba ifisadaa ka habar-wacatay.  
Hilaacay isugu baaqday. ~~Goofaadhtankana, Kalaash~~  
koofka is kala gura, Faalka gur'an ee ka-jaameeya  
bidixda, Afar-iyo-toban-laha 'Kac tag' leeya,  
iyo Saarkaa ku googaalaystay. Hojiskay ku kala rog-  
teen. Hooriskana way isugu xarakeeyeen.

Galayaxii rasaastuu Sigadná ilqoodha ka milic-  
 aay. "Maya. Lays ma gelin, oo dagaal maaha. Aroos  
 iyo alag-alagtiina ha sheegin. Lays qoonsayooba  
 gayiga, "Gabadha soo gelbiyaay..." kamay yeedhin.  
 Gaaf, guyaal iyo guyaal, laga ma dhigin. "Guulalee  
 ...", oo lagaga mashxaradiyo, giblo iyo cayaarina  
 kumay soo dhawaan. Jeer horey ka guureen. Nabaddaba  
 kamay lug dambayn. La geeddi bay ahaayeen. Habeen gol-  
 madaw, oo Ina Talaado Gudcuro ah, ayay ka jaqaafiy-  
 een. Ka gude, oo dan baa tidhi. Guurahay ka raaceen.

Sidii bayna u maqan yihiin. Lama arag. Ishii baa loo  
 lahaa. Ma dhulkaa liqan? Mooyi. Gabalaha dusheeniyo,  
 ma cirkay ku laalan yihiin? Mooyi... Mooyi. Ma la teb-  
 ay? Ma'daba ka daa! Oo isku ma jiraane, nabad iyo  
 baahida caawa loo qabo, balkiba ha gelin! Go'e, la  
 ma tebinuune, waaba loo tar-wadhay! Waayo, NOLOLI  
 WAA NABAD! NABADINA WAA NOLOL! Qoryuhuna, gablame,  
 bilaash uma onkodayaan. La'aanteeda ayay' ogyihiin.  
 Geeri baa golahaedii ka helalaysanaysa. Gumucuna  
 maan-la'aan isu ma xabeebinayo. Geedkeed ba'duu hooy-  
 iwaalaha ugu jiibinayaa. Talada murkucatiyo miyir-  
 diinkaa fahma-guur kugu ridaye, dagaalkuna, qabar  
 kugu dhacye, daqiiqadaha laysku afuufayee raggu  
 sida roobka u qubanayo, uun maaha. Ka shisheeyee.  
 Qardooxada ugu horaysa, kolay qanjiidho ku tahay,  
 ee nabadda loo geysto, ayuu soo bilaabmaa. Cabbayn, ku  
 siiqid --, iyo riishadoo la taabto intaan layslaba soo  
 gaadhin, sidashada qorigoo keliyaaba, u ah sideeda  
 dirir. Bajin, handadaad, iyo caga-juglaynba way ka  
 sina ballaadhan tahay. Dhafoor taabasho iyo gacan-  
 qaad nabar kula soo maqan ayuu ku yahay qofkaan ku-  
 la sidan. Nabadda se ula muu hadhin. Wuuba ku 'Qac'  
 yidhi. Muuqaalkuuna ku dhaawacay....", Sigad iyo  
 kashiisu ku murme.

Shide se wuu ka xog-la'aa. Tiisaa (cuslaysay).  
 Xaggiyo warka tuura-gooyntiisuu ku foognaa. Tu kal-  
 aba fakaag umuu hayn. Siday uga dhabaqday baa aad  
 ugu dhignayd. Haankay kaga turqanayd. Hanaqana way  
 ka soo gujinaysay. "Hadal", bay ku lahayd.

Sideeduu isna, wadaanta ugu hayay. Darkuu uga  
 haloosiyay. Kolba hormuu ku soo daynayay. Si weyn  
 buu ugu heelanaa.

Marakan se, hudintiyoo sii hawadinteedii wuu ee yar aalay. Su'aal buu ku xakameeyay. Gorodana taggii Sigad ayuu soo lalmiyay. Yidhi, oo afkana oo soo yuub: "Baabuurkii aagaba lagu furay, iyo gurgushaagii Daba-qalaal ahaa, ninkii qalay, ee dhuunta ku dhuftay miyaad ka habaabi?"

Fajicisaa loo keenay Sigad. Fallaadh bay weydiintu ku noqotay. Muu filayn. Wuu ku fir-ka-naxay. Aad buu u yaab-yaabay. Af-dhalaal baa ka soo hadhay. Hortiisana, Ma-liibaane hālaagan, oo labadaaba ka guban, bar-yar oo witirsan, dhulkana ku dhow oo dhagafsan, ood jiifaa soo dhabacan maadaa, isa soo dhidbay.

"Yaa? Yaa? Gartay.....Gartay!" iyo, "Markii wax lagu sheegaad, wax garataaye, walba hebel Raamsadaha la sheegayay, iyo ninka lagu jabay ee ay fidmaduba ka askuntay, kii Cabdi ahaa, miyaa?", ayuu nabar dabadii ku guuxay.

"Ha u noqon. Waa qudhiisii, oon biyo is-marin..."

"Haye?"

"Habeenkan caawa ah, wuu innaga hooseeyaa. Ilaahna siduu doono ha ka yeelo. Anse ribayn maayo. Wuxuunan qabin iyo hiba qaydhiinna ku waab isma lihi. Wehel-ma-doontii baa i sugaysa. Dhinacaygaan u tudhayaa. Tafaasiil kalana isku daalin maayo. Nin tegaya se ishii, wuu lahaa. Biya rarashuu muddaba ku jiray. Tagganaan xadka dhaaftay, oo ka talawday xuduudka, dabarkana goosatay baa laga soo taagay. Dayday buu iimaan-yoognimadii ku darsaday. 'Maxaan cunaa... Maxaan cunaa?' afaan ahaynba waa laga waayay. Malafsi baa laga soo waddacay. Baabuur galawda la taabto iyo bir la calashaduu, meheradba ka dhigtay...."

"Gartay?"

"Buun-buunin maayo. Beenna nacalaa ku yaal. Waxba ku fali maayo. Xaynuu se Madoobe dheerihii Daraawiishtu lahaan jirtay u weynaa, Susukidan aad

hanbadeeda dhabarka ku haysaana u yarayd, ayuu bil gudaheed kaga soo baxay. Axad ugu muu tegin. Dirkaba isagaa kaga deebiyay. Lala ma arag. Halkaasuu wada mariyay. Bool-bool ayuu u furfurtay. Dhawrkii maalmood-ba mid buu quwaaxsaday. Af mamay, oo madhnaanta diiduu ku daabulay. Hunguri waashoo war qabaa u wiideeyay. Daankuu ku qadhiidhay. Kaga muu tegin. 'Nah' buu ka siiyay. Hadana may solin. Canba kaga may dhicin. Yaaf-yaaf iyo yaahuu bay la tiinbadeen. 'Uhu' ayuu ka qaaday. Soomal-haad iyo sakaar olol buu ka taransaday. Bel-uu daliigay. Baasna wuu dudubiyay. Intuba calooshiisay isugu tageen. Meel'baa' qaq lahayd. Farba inuu muudsaday u muu haysan....."

"Gartay?"

"Waa se qaamudkii gelay, Iska-rogadii Garaan Biigu saarnaa, ee uu taliyaha Colaadkii far-ma-gaadh-ada lahaa ka ahaa, maalintuu isku qaaday. Dib carrab iyo laba daan ugu muu calaalin. Caleentiisaa ku cadaatay. Cantuuga wablayntii baa hoday. Laf dhaaratoo, dh-aadatay ayuu isku doontay. Dhuuntay iyaduna saa isu dherertay. Xakab jabay sidii bay isugu takhashay. Dhan-kaa iyo dhankaa toona way u dhaafi wayday. Kadabkiisaa ku go'ay. Kan cad bay ka martay...."

Gadh-madoobe sugula; samay toosan u dhashay; hangoalka wakhtigu la tiigsaday; golxadu soo yarahe qal-oocisay; isku joogo hareedku; salxanyuhu dherer la hillaacayaan; indhuhuna dab ka kulul yihiin, ooy day-madoodu birta ka lab tahay, ayuu Sigad ka halacsaday maanka. Colaad buu xusuusta ugu gacan-hadiyay. Isna jaahiisuu, isagoo car iyo bayba la' isa soo liqdaara:

"Cagiduu ka hinqaday carriga ma leh! Tahan bay caawa jirtaa. Intaan la aaya beelin ayay ahayd. Ma dh-awa. Abeesa isu dhiibkaba way ka horeysay. Caymay amin-kaa lahayd. Hadda se oodeedu dhalankay rogatay. Dhagar iyo Ilma Dhacameed baa ku gudban. KU tahan-baab ma la ha. Sannad iyo Is-yeel-yeel SHEEKADOODU TAHAY DHIIG ayaaba la joogaa!" iyo "Sannadaa? Sixi-waa kugu dhac Suurow daranaa! Intaan layna marinba se xusuus-gedka waad lahayd. Gaddu, Galbi-laawe, waa gadaadii .

"Laguugu ma ducayn. Habaar baa kaaga dhacay. Lagugu-  
mana haleeyo. Weligaaba Maqane-jooga, oo maahsan baad  
ahayd. Maaha ceebtaa. Waaba caadkaa. Eeggiyo qarracank-  
ana, Geer-yaad iyo Gunti-dhiig baydin kala dhex-qaad-  
ay. Ma haysid barteed. Baadina kuuma aha. Qamigaa diiday  
Qulubkaan kuu oggolayn. Hungaad ka joogtaa. Suxul-saaxi  
iyo soobir qaawan baad ka tahay. Laguu maba qorin. Iniq  
yarina kaaga ma qoolla. Allaahu-maala-beeg baad ka ta-  
agan tahay. Tuhun iyo hafarkii, dhalaal kugu baydhay.  
iyo hadduu dhhaar-shil jirayna, ka haawatay. Dheellima-  
shadii buu kaa raacay. Ka huleeshay. Dabayl baad ka hag-  
oogan tahay. Imikiyo, ~~milaygi~~ Colaad isugu keen dam-  
beeyayna, lagaa masaxye, sanad iyo maaha sukahaad ku  
hawaawiday toona. Laba maytidood la naarayoo, dhamac  
darartay, dakane hadimo dhaadhyay, iyo dhuxul cadaab-  
eed inaga waraabiyay weeye. Dhimasho, dhaawac iyo dh-  
iig-bax baa ku dheeriya!", Sigad iyo kashiisu ku gaa-  
gaabsade.

Fari kama qodna. Kow ma joogo habeenku. Weli waa  
fiid. Afarteeda kala guran, iyo goonyahaba, dhoonbir-  
kaa ka hugmaaya. Onkodkuu ku hooyaalinaaya. Falfaloos-  
tuna seeraaraday ugu ~~nash~~ xaradaysaa. Sheekadaa u taxar

Shidona, sidi buu hadalka u dhilayay. Dhadhan buu  
ku hayay. Hadduun buu se meeris dhammeeyay. Dhag buu  
siiyay. Umuu se xiiq-tiran. Haaneedkana iska muu soo  
dhiibin. Qorma horluu markiiba ku dhinac qabtay:

"Shilkaba se, anagaa isu gaysanay. Kama dhacno,  
'Habeenkii layla lalay.... Higlaan hoosteed fadhiyay',  
baar-cadihii ku halaan-halay. Annagaaba baro dheer,  
ooy waalidu dharaar, maalin-weyn, na dhifsatay. Taas-  
ina, Cabdi-raamsade, oo aannu lafihiisa cadcad naqaa-  
nno, inuu madaxa Tiknikada ardaaga noqdo, dharaartaa-  
nnu, 'Sidiqtu' nidhi bay ahayd. Na loogama horeyn. Maal-  
intaa baas baa nala qaatay. Welina nala ma dhigin. Sid-  
ii baa na loo sitaa!", ayuu Shide ku qamuunyooday.

Wuu qunbacday. Biya karayay gocashadu ku soo hamboor-  
iday. Bayl baa ku soo rogmaday. Dalqadana, baaskii Ra-  
amsade jiidhay, iyo siduu ardaagoodu isugu jabay, baa  
ka soo haraatiday. Arbaca goonyaadkii bisha u dambay-  
say, iyo bilawgii buu kolkaa kaga soo qabtay. Dabaduu  
ka soo gelay.....

Sigad se goorahanba la lug muu ahayn. Shidoo caleema-saarkii Raamsade ka yimi, aan se rubad-go' iisii weli soo gaadhin, ayuu ka goostay. Higladii baar-cadaha lagu helayba kamay soo dhacmin. Way maqlaysay. Naxba kamay soo maqnayn. Maqal-daaqdiyo meelaheedu kaga hadhay. Lamuu soo gudbin. Dib ayuu isu jimbacay. Duudkuu u jeediyay.

-IV-

"Geed walba in gubtaa, inay hoos taalo kugu ma diidani. Waan kula siistay. Wajaafka jartaaleeyayse kama yeelin. Maya. Ardaa iyo gaarkii muu ahayn. Jigre muu sidan. Wadhafkiisuna xabad-keliyaale maaha. Hal-dhabaalaysi ma yaqaan. Hambo kama tago. Garoocasho, daanku-gogosho, iyo gawl-gawlid kuma ceeshoo. 'Berraa daran',\* isagoo, sida yidhi abeesada, lama sheegin waqii. Sawracba uma laha. Soo-ma-hooyihii ina la haadayna, duwane labada hore habeed kula leh muu ahayn. Ugub lamuu iman

"Ha yabaalin  
Ha la yuusin  
Miyir yeelo !

Kolla Yeed  
Yaambadaada  
Kaga yaaci,  
Kolla Yufle  
Yeekahaaga  
Kaga yaabso !

Yam ka sii  
Yar-yarayso  
Yaad ku margane! ", iyo hala-halayso toona ismuu odhan. Wuu saabilay. Sa'da iyo Ma'daba mar buu saanyaday. Isha umuu marmaran. Soomaaliba duuduub ayuu ku saameelay. Far iyo suulla wuu ku sii lalansaday! ", nabdiga Sigad kaga dunuunuc. Cagta se umuu dhigin. Wuu ka jeedladay. Hamiguu ku sii jaqaafiyay.

"Habaar-biiray hortiina, xariir iyo xalay-

\* 'Berraa daran e, bur dhaf', \*

dhalay maynaan ahayn.Maskax-garaaday I-filadu inagaga maqnayd.Maynaan saaloonayn.Waa layna soo galaan-gelayay.Saf baa kasmadaenna jiray.Sagaal buu miranaayay.Intaana sahanuu ka meerinayay.Dooyadana wuu galaa-bixinayay.Dheglaa salag lahayd.Waa lay nagu soo jiray.Jeeruu se ina miray, is maynaan madax marin!", niyadda Sigad kaga halaan-hal.Ma buu se hakin.Horuu u sii amb-aqaaday.

"Dagaal maalkiyo mucaaridkiina, u maynaan labaynayn.Midigtaa amranayd.Magligaa talinaayay.Muusanaw diriroo; marya -dhiigle furtuu, muraadkeennu ahaa.Kala miiranna maalin buu inoogu dhawaa.Malkadii shir giraan-gir iyo maalintii madaleed bay ahayd.Maragna waa bay lahayd!", ku gooraantay naftiisu.Wuu ka iladay Sigad.Hiyigaa laga gujiyay.Xaggiyo tagtadii laga yimi ayaa looga yeedhay.Cindiguu ka guureeyay.Mugdiguu ka halabsaday.Maankiisuu la sii shawray.Gudcurkii magangooye, ayuu afka saaray.Kashuu ka sii xisaabtay.Dakh-aradana, sidii DIBEDYAAL\* ayuu xusuusta ku taataabtay

"Labaatan daboo  
                   sidi danab  
 Diriday cuskadaan  
                   daluun tahay,  
 Dalool iyo dhaad  
                   dam iyo nabar  
 Ayuu diilalyada  
                   ku daabayo  
 Kanay dilay  
                   oyla daadegay !  
 Darayгаа wadhan  
                   ee daboolka la'  
 Ninkii doonayaaba  
                   uu daro  
 Duflaal ma noqdeen  
                   dabayshaday

---

\*M.I.Warsame(Hadraawi) maansadiisa 'Dibedyaal', shakhsiyada suugaaneed ee laf-dhabarka u ah weeye.



"Isagaa dacda

24

daarka ii dhigay !

"Isagaa dawriyada

inlay duro

Dig-dhawgayga bariyo

inlay daho

Isagaygu dalbaday

dugaagaba !

Duraaqsigu

waa daraadii

Hadaanu i dardarin

ma diideen

Doogtiisaan abid

i daynayn !

Kaskaygan dufoobay,

doorakhay

Diraacdu heshaye

dilaamaye

Dayoobaye jeer

is daba maray

Doorsoonkuba

waa daraadii

Hadaanu i dardarin

ma diideen

Doogtiisaan abid

i daynayn !", ayuu Sigad kaga gooh-

ay caloosha. Falashuu ku aasay dibnaha. Gubtaanyadana wehel buu ka dhigtay. Xanuunkaa sii garab-gelay. Dam-aquna kamuu taban-taabo la'ayn. Toobiyuhuu u tilmaamay. ISna wuu ku sii jiitamay. Dakharkii xigay ayuu ku hirtay. "Iyadoo ka habaysa

dhawr hilin

Kolkeeda horaba

halaysnayd

Halgaad iyo sebenku

huudh baas

Haantuu huwiyye

humaajiyay

Hangoolkiisu

haaro kaga tegay;

"Haantuu hafar iyo  
                   huf iyo been  
 Habaas ku cidaaday  
                   Haydaar;  
 Hawada lalmiyaye  
                   la haadaye  
 Hantaaqiyay  
                   Soo-ma-hooyuhu;  
 Haantuu Baqayana  
                   hankaagsaday  
 La haybsaday  
                   Hadimo weerey;  
 Halaag iyo Mawd  
                   hankaabsaday  
 Haantii dhex martaye  
                   hanqaarada  
 Hanfade kala booday  
                   haadaan,  
 'Haqday', tidhi  
                   haanku soo go'ay  
 Kala heermaye  
                   hilaygu kala lumay  
 Hadhuubku ku duulay  
                   Hayhaat  
 Ku heega dhaceen  
                   hilfuhu Xamar  
 Hayaheedu Tog-dheer  
                   ku hibitiqay  
 Hagoogtu ka tidhi  
                   'Hayaay' Harar  
 Haybooqan gardaadku  
                   haabtaye  
 Lingaxuna hundo webi  
                   ku hoobtaye  
 U heegtiyay saabku  
                   Hiiraan!  
 Sideed u halwaday  
                   u hoogaye  
 Ma laasimay hiif  
                   habeen gala !", ku gunuunucday laabtiisu .  
 Dakharraduu isaga dab-qaaday. Dakhar buu ku hoyday.

Dakhar buu ka jarmaaday. Dakhar buu hadhsaday. Dakhar kaluu ka haybsaday. Dakharradaa isu dhiibay. Dakharba, dakhar buu fartawgu goday. Dakharba, dakhar buu sii gudbiyay. Dakharray ugu bilatay. Wuu ka dhammaan waayay.

"Shantaa gacantaa  
galaysa kanoo,  
God weeye kani  
keeri waa goof !

Laftuu gurayoo  
kanay gambiyay

\*Diinluu igu gaadhay

goor baas..... ", IYO alaladkaa wuxuu jeer ku boer ololaba, ammin dambuu kii hiirtaanyada-ba ku huriyay, murdisada ku muday. Hagardaamuu se ka taransaday. Good baa ku yaacay. Tin iyo cidhibna waa lagu rooray. Jilbis baa xusuusta ku saydhay. Jidhkuu is-geliyay. Hanaqana wuu ka jidhidhicooday.

"Todoba biloodoon ku ba'y, oo todobaatan igaga daranoon ku *bayd g'ay*, baa ka soo meeray. Lahan buu igula habsaday. Naxlina wuu igu gagabiyay. Kamaan soo waaqsan qamashtii. Waan la taqaaqufay. Halbawluhuna, igu dhacyooba, hoorrimaadka muu dayn. Dhulkuu ku irm-anaa. Dhiig buu ku habayay!", gawnaxyada ku buur Sigad. Ladh baa ku soo kacay. Hoos buu isugu dumay. Gorodii awalba laalaaday, ayuu sii lalmiyay. Gonduu kula ciiray. Arami buu la hogtay. Uur-ku-taalana wuu la hoogaansaday.

"Lugaba, markuu igu onkoday, kumaan taagnayn. Alluun baa tayda ogaa. Saawa-saawahaa igu **talax-tegay.** Wadnaahaa i toobnaa. Wayba igu daba yarayd. Isna iiga muu tudhin. Wuuba ila hiishaday," intuu ku calool-balbalay, gawsahana is-dhaafsaday, ayuu bogga kaga hiinraagay:

"Inay iga hoostay  
                  buu hubay  
Hadhiina u kadan  
                  hadaanan ahayn

"Imuu holliyeen  
                                   habaar-qabe !  
 Habsaday kolku  
                                   nabarka igu horay  
 Jeeruu i hawiray  
                                   ma hiir dayn !  
 Haleeyaay madal  
                                   hinaasaley  
 Hadimaale shirkii  
                                   i haaligay  
 Hoheey! Caku  
                                   hibasha weynaa!"

Niyadduu Sigad ka sii haajiray. Mejiyo dadabtii laga raacay buu u qumay. Taahuu ku sii luuday. Hiigana wuu ka sii dhutiyay. Laba boqol iyo toban habeen buu sidaa u sii jeeday. Sahayna mur iyo dacr ayaa u ahaa. Wuu ku sii jid-maray. Hogtii lagu haleel buu, wuxuu sii hitiqiyaba, ka daahiray. Milay kulul ayuu isa sii taagay.

-V-

Qumanayaashii baa laysla jiidhay. 'I jiid aan ku jiidde!', baa ka dhacday. Gadh-badh baa laysgu dhintay. Ninba ceesaantii buu ceel keenay. 'Wuu gidaaday hadalkii. Waana laysku mada go'ay.

DAR baa yidhi, "Calaw murugsan, oon madax iyo rinjo kala lahayn, meel loo raacana lahayn ku geli mayno. Waa aafu. Inagaabu halis inagu yahay. 'Fagax' iyo farda diday sidood ha u farandilaysana, talo naaha. Ina wadi mayso. Kob caleenlena kaga soo durdurin mayno. Duubiyaal isku ~~cira~~ iyo dambakhaad dhexdeenna ah, uun weeye waxaynu uga aynaa. Horana, "Waayeel waa ayo?" iyo, "Waa innaga, hadaynaan isyeel-yeelayn," baa loo yidhi.

Haatan iyo danna, TALIS MIDA iyo CIIDAN MIDAYSAN ayay teennu ku jirtaa. Wakhtigaa, rag Allow, sidaa ina faraya. Waayahaa inoo yeedhinaya. **Yaynaan u labayn!**

DAR kalaa ka dhinac kacay. 'Af, af loo hayaa baly', bay isugu baadeen. Way ka daba dhaansadeen. Cagtay, cagta u saareen. Laba daan iyo carrab daranoo, hadal daaqsaday, ayay xakamaha uga daayeen. Raadkoodii bay isku sii dhigeen. Dhegahay ku sii nabeen. Dib ayay ugu sii dhalan-dhooleen. Kala may hadhin. Halkay cidhib dhigeenba, jaantay ku dhereriyeen. Bartuu suulkoodu daarayna, shantay ku ballaadhiyeen. Qashar kaga may reebin. Way la daba jibaacsadeen.

Wadhoodii u weynayd se dib bay ugu dhigteen. Way ula gelin-dambeedsadeen. Shide Durdur baana u riday. Hadal-dhaadhi weeye, afkaa wax loogu tiray. Iyana way ku ogaayeen. Dhabarkay ka taabteen. "Waku-kaa" iyo, "Badaadiyo tii, Shidow lagu baray, ku barriiji, ragoo ku baalbaal...", bay yidhaahdeen.

Isna wuu isula gaabiyay. "Soomaali isu ma askariy-ayso, may-gidhiishtah, iyo makeekiga, maxaa laga wadaa? Walle waa yaab! Bal se aan is weydiinee, midkaan, midka labaad lahayn iyo talis midaysanina waa kuma? Ka halkaa maanta ina dhigay, ee dhulka inala gooyay, miyaanu ahayn? Innagiyo keli-talis iyo talo la maroorsadaba, kii iskeen baray, miyaanu ahayn? Ciidan midaysanina waa kee? Habaar-qabuhu midiidinkuu inagu xaraamiyay, iyo kii ina moora-duugay, miyuunan ahayn? Maynagaase ah, ku damboo dhuunta inaga xurbiya, oo inaga dhammeeya, kuwii midigtooda ku korsan lahaa? La gar-naqye, malaha waynu marraysan nahay!"

"Teeda kale, gaasaska ardaayada, maxaa lay noogu bahala gelinayaa? Maxaynu se guurtida beelaha ee ikh-yaarta ah, iyo rijaal qabaa'ilka dhaatay, uga abaal-ka dhacaynaa? War sida cawska jiilaal, miyaaney ma-huraankii ahayn? Aduunyada! War shalay, inagoo Allaahu mala-beeg ahoo muruxsan, oo kabna lulayna, kabna laalaadinayna, oo taa iyo taaba ka hoorayna, asaag-eenna ina wado, kuwaynnu nafta kula eeranay, ee inagu hagoogtay miyaaney ahayn? Ragga se go'a loo ridayo, ee geeska lagu feedhayaa, qudh iyo maalba raggii u huray, ee ku tiir iyo tacaba beelay, ee lahaa halagankaba miyaaney ahayn? Yaa!?"

"Yaa?Dhaartaye, tu kalaa ka dhega-weyn!", iyo har-awaati buu oodda kaga qaaday. Gadhkuu u geliyay. Wuu afuufay. Kamuu hanbaysan. Gacamadii laabtuuba u fur-furay. Mooskuu uga jabiyay. Wuu ku faaruqiyay.

Wuxuu se jeer, dhool gu' sidii, ka hillaaco dhooshaba, nabar dabadii buu meexanihiisii ku soo waa-biyay, "Gasabkaa adduun  
 Goon-dhabaale iyo  
 Garan waa miyaa?  
 Marna gaadh dabliyo  
 Gaashaan ka dhigo  
 Iyo gudin af-weyn,  
 Goortaad rabtana  
 Kaba gooso iyo  
 Garan-gari miyaa?"

Golihiina xamxam iyo gedaan-dhabashaa ka ka bilaabantay. Indhahabaa laysku gujiyay. Daymadaa lagu faqay. Ushana waa laysku ~~waa~~ taabtay. Sii korodhyay guuxii. Kor baa loo qaaday. "Shoola-booliduna waa maxay?"; iyo, "Ma afarray baa lala soo shirtay?", ayaa xaggan iyo xagganba ka yeedhay.

Shidana isku muu sii dhejin. Horuu u soo biya-dhacay. Dhaad-dhaadid bay goorahanba, hawraartu ka ahayd. Eggana kumuu sii tiigaalin. Intuunan se soo gunaanadin, baanisada xadhigeeduna ka soo meerin, 'Oo maxaan kaga tegay?' xabeeb tirasho ka ah, iyo madaxa oo uu dib u yar gundhiyo, ayuu isku mataaniyay. Hinjiyoo, kolkaa, guntiga tuu kula hadhay, u miisaan. Wuu ula hubsaday. Af-saar bayna ahayd.

"Ha laguu galo, oo ha gudin, habaar kama weyna. Inta laga ducaystee, laga hoos galo Eebbe, ayay maqadin u tahay. Loo ma yeedho, lamana duraansado. Bisink-iyo Burdahaaba laga cuskadaa. "Allow ~~aga~~ hay, oo na baal mari", baa se lagaga nabeadiina xidhaaye, tan lay noo la yimi, maxaad u malayseen? Iyadii oo badhax

" la' miyaaney ahayn? Halla wayga su'aale;  
 Gablan loo hadhiyo  
 Inagoo gunoo  
 Gurigeenu ba'ay,  
 Gabo-gabo raggii  
 Guluf iyo dagaal  
 Awgeen u galay,  
 Gaaskii ardaa  
 Iyo geed-labkii  
 Gobta inaga dhigay,  
 In la gawdhiyoo  
 Libintood la gado  
 Gar miyaa shirkow?!?", ayuu Shide ku soo gun-  
 dhebey. Miilaysi hadal iyo meerto loo kaltamana mark-  
 aasaa u dambaysay. Leexaa u galaashay geedkii! Gug'baa  
 laysku yidhi. Maayaddaa is jiidhay. Gorodaa lays la sii  
 gelay. Mawjadahaa is mukhuurtay. Qayladaa ka daluuntay  
 iimalkii. Waana laysku cayn iyo bayd go'ay....

## -VI-

- \_\_\_ "Allay lehe, maya."  
 \_\_\_ "Wagagac! Waxaasaa wanjalaada."  
 \_\_\_ "Xaashaa kala!"  
 \_\_\_ "War ma noola-uraa, ninku naara, afuufsanaa?!"  
 \_\_\_ "Afku kuma go'o."  
 \_\_\_ "Carrabku kaa soo dhac! Muxuu beelo isku gubay."  
 \_\_\_ "Laaxin laga jari, maayo."  
 \_\_\_ "Midh xalaala ma sheegin."  
 \_\_\_ "Bafiraadi hadeer, halla kuu tari mayso."  
 \_\_\_ "Qodmi maayo, hogiinnu."  
 \_\_\_ "Habaar waa dibed."  
 \_\_\_ "Ku qandhuufashiyo  
 Diredire qarriban  
 Iyo nabar qarsoon  
 Idinkiyo Qorqode  
 Qusum iyo lag baad  
 Kala qaadateen  
 Waad qaybsateen!"  
 \_\_\_ "Ardaayadu waa cawaan  
 Caws iyo waa biya-ku-nool

Sidliyo wayska maahu-daar

Caqliga geelaa ku jira,

Codkii yidhiyow, qushkiyo

Cabeebkiyo cudurka baas

Cadhada haygula galgalan!"

"Maansha la yidhi, 'Si xun wax u sheeg, sixirkaba ka daran."

"Waraabow micida garan

Gufaacada hore waxaad

Galawda ku aroorisaba,

Markii lays galalafee

Gagsiga loo baahan yahay

'Wax baaskiyo lagu go'dii

Maxaa ii geeyay' iyo

Maxaan 'Gii' kaa maqlay!"

"Sidi, sididaada mooyee, dhul dhacaaga hubso."

"Soomaalidu waxay tidhaa,

'Ninkii aad kaba ka tolan

Kuwiisaad tooyataa

Ka taamila qaadataa!"

Adoo tobankaba buskiyo

Awaare la tiimbadoo

Habaas iyo turaab iladay,

Adoo taadii la lumay

Miyaad **ani** talo i siin?!"

"Tarbiic jabisiyo wixii

Adiga tuur kula leh baa

Nin kale loo toosiyaa !

Bilaash iyo tororog iyo

Af tookhaayaa diloo

Tisqaad noqon waa tiraab !

Adduun lagu tacab khasaar !

Ninkaan kaa tegin Taneey

Tabaaluu kuugu dhiman !", **iyo wahad-baa laysku**

af rogay. Muran kululoo mindi, mindi ku taag ah baa

kala malmalay golihi. Safaynkiiba waa lays kala teg

ay. Laba, labaa laysugu madhuxsaday. Gaarkeed bay la-

ba waliba isu qarmacday. Hirig baa laysku noqday.

Waana laysku shuf beelay.



Iluu miirta ka dhiguu Sigadna miciin mooday.  
 Way ku baahday."Ku heshiin wayday qawlkaa. Qasdira  
 siday isugu keeni mooyaan...Mooyaan?Maxay noqon  
 Allahayow?", iyo isla-hadal baa la faaqsaday. Afka  
 wuu ka gamashiyay. Dibnuhuna hawraar iyo hadashadeedba  
 way ka gaagaxeen. Jeer horuu ka gaabsaday. Dhegtana  
 maqal goorahanba umuu hoorinayn. Cindiidkii baa ku bat  
 ay. Isna wuu ka qataartay.

Qalbiguu se ka godlanaa. "Guumaystii hambadiisa  
 Huubaduu cirir reebay,  
 'Way hadhiina, 'tidhee  
 Horortee, rag Allow  
 Sida haad-adagtii  
 Haw ku soo tidhiyee  
 Hafsiisee, la kudee  
 Faruuryaa ku hortee,  
 Hiinsaday tidhiyuun  
 Hadhkeedii la tusee  
 Uu masayr hud-hudaa  
 Hiir ku soo kiciyee,  
 'O heblaaya Calaaay  
 Ma haweeney kaloo  
 Kaa horyaalsan adaa  
 Heeladkeenan jirta?  
 Hoogto waa ku sidee?!'  
 Fara-laab iyo hoos  
 Uga dhiibay huqdee,  
 Xinku sii holciyee  
 La hulaaqdaye ciil  
 Hurushawday dartii,  
 Ee huruuf iyo giir  
 Hatigaad wata jeer  
 Ku halgaaday banaan  
 Ee dagaal iyo hiif  
 Cidladii huwisee,  
 'Yay horteed cabiyoo  
 Habeedeeda gaya!?!'  
 Hinaasaa ku tidhee,  
 Hadhuubkii gambidee  
 Haawataa, dhugato  
 Shirku uu la habloobay!

"Hadala heega-dhacoo  
 Hooyadii dhimataa  
 Heemiyoo dhegihii  
 Ka haraatiyayoo,  
 Hugunkaa dardhiyee  
 Ka ilaala hoydaa  
 Hadhuudhlaa ku daroo,  
 Baqaskay hufayaan  
 Kala haadinayaan  
 Yaa habaar ku noqdoo  
 Shirku heeca ka qaaday!  
 Sida haytoloshkii  
 Ma habeen taladee,  
 Maalintii Boqon-heer  
 Dar la hiishadayoo  
 Hiigay baa, rag Allow  
 Weli gaadh ka hayoo,  
 Kuwi hooshay markii  
 Maadku uu ku dhacaa  
 Hareeraa ka lushoo,  
 Hinqan maayo intay  
 Hiimamawga tahee  
 Hilbihiisa kuwii  
 Ku hagoogan lahaa

Habeen ay gudayaan!", ayuu dareenkiisu ku liif-  
 adaynayay. Geeraarkana caloolyow baa ka keenay. Way ku  
 ballaadhatay Sigad.

-VII-

"Talada la kala heli og. Hadalkana waa la kala  
 odhan yaqaan. Ragbase, laguma dhaamee, dhaqaaq-d-iyo  
 is-moodkaa isu geeya. La'aantood ismay eedeen. Golah-  
 aad xogtiisa i weydiiseenna, idiin ka warramay. Qab,  
 qab dhaafay baa dilay. Raaf dilaac iyo fahma guur buu  
 ku riday. Hanaan laba-shubkay doodi lahayd-ba wuu ka  
 deedafeeyay. Dibedduu ka dhigay. Ra'yigii, dhegaha u la  
 aa ra'viga kale iyo kala -rogashana iska ilow. Maaf bu  
 ka dhigay. Meel daran, malmalan, iyo reero muskood ayu  
 kaga laalay. Jaantaa rogan iyo jaafaajiriq buu se hal-  
 koodii ugu bedelay. Mubaax buu uga yeelay. Xeerra, 'Mar-  
 so taadoo, tiisa muran geli, dhegahana maro!', ayuu

...aga dhigay. Looxuu ugu duugay. 'Hadal muushoo  
 Maakhadayn iyo  
 Mushtar loo yidhi  
 Macdaar lagu gado  
 Madashaay, noqo!  
 Been magooshiyo  
 Hebel midabayn  
 Ku maxaafsada  
**Maf-rish** kaa dhigay!  
 Dantii maarriyo  
 Mixnad socotaa  
 Kaa muraadsade!  
 Yoose kula meer  
 Co ku maydhaan !  
 Maama-weynana  
 Mingis kaa tumay!', iyo

xardhaasuu : malakadeedoo dhan ku xaadiriyay, oo uu  
 far-hunguri ku xariiqay, gusuraatina uu ku xardhay,  
 buu u jaxaasay. Tahliil buu ugu tufay, is-maan-dhaaf.  
 Wuu ku cashariyay. Ku Yaasiimi yaahuu. Is-mari-waana u-  
 gu xirsi-xidh. Xadhig maran, aan jid-gelin, jidna ka  
 bixin, iyo xanniban isku cuna duuban, oo uu quful  
 rayfaliya, oo 'Naynba, naynn ahi ku jabsan yahay, ayuu  
 ka soo saaray. Isagaa ku lahaaday. Tabtuu waday iyo  
 wakala-jeden bay ku dambaysay. Waaba laysku margaday.  
 'Wareerka, wareerka gaadhsii', baa ka dhacday. Jiq baa  
 laysku noqday. Waana laysla wajaqay, oo hebelba, hebel  
 buu ku sooyaanshay. Hebelba, hebel buu tabcada sudhay.  
 Hebelba, hebel buu sinsaaro ku deyay. Hebelba, hebel  
 buu sutida u qabtay. Baarqabadii baa, si kale kuma  
 garatide, is helay. Af babana, carrab biriigaana, iyo  
 badh-dalool sidatooy dalqadii babiya ahayd, baa lay-  
 su la baxay. Bun lays kama dhimin. Belaa laysku hurg-  
 ufay. Teelo laysu dhigtiyo tudhidna daa. Bumbadii gab-  
 alaaxsanayd baaba laysugu badhxay. Garnaylo ayaa lay-  
 saga gooyay gaanjada. Candhadaa laysu galiyay. Ninba  
 tiisii buu isla toxonbodhiyay. Wuu ku quruuruxiyay.  
 Hansal layska qaado iyo haad la kala qaatana, haba  
 soo qaadin. **Wagaradkaa u-go'ay.** Ciin bay daaqday.  
**Col. baa ka shaxay. Caynkeeduna wuu wareegay.**

Buuqaa isu ligay sidii boodh. Butuluqsi baa ka  
adeegay. Faruurtuu qabsaday. Yabaqaa ku waalaystay.  
Eugunkaa ku washiiriyay. Duryankuna wuu ka shirbay.  
Buuftaa ka kartay.

"Isagoo bislehoon  
tarkiisu billayn,  
Isagoo badh ka hadho  
baftada qayd  
Baraarka ku raaca  
burucyada,  
Imikana bulbushiyo  
buluugii  
Cadaan iyo bay  
carradu badhax  
U kala bixisiyo  
adari boodh,  
Tan iyo berigaa  
bilaw alif  
Nimaan barashada  
ka buuxsaday,  
Bogtayoo isna  
tayda beegsaday  
Waxaygu banaan  
bayaansaday  
Ayaan buriyeen  
bartaydaba!

Ninkii ka baxaye  
ka beermaye  
Hiddaha bacrinta a  
berriinsaday,  
Bulshadu'Hayga dhicin  
ha baydadin  
'Ha buubin'ku tidhi  
baxnaanada,  
Bursadee baayadiisa  
baan helay  
Ku baaluqay  
berriga Soomaal  
Barbaarnimadiina  
baar fidhay,

Dareen bolol iyo  
     bukaan dhaqan  
 Ka baryee, ka badbaaday  
     baasaha,  
 Buduu ku dashiyo  
     bahdiisii  
 Huliyo biya-diid  
     ka barakicin  
 Balfiyee yidhi,  
     'Belaa'yo iga baydh',  
 Burkiyo kaga hoyday  
     buulkeen  
 Bidada ugu bixin  
     banaanada,  
 Busayla u gelin  
     wax biira a  
 Habeen-bari,  
     badaha soo maray  
 Amaan bisin lagu  
     ballaysimin,  
 Bariis iyo  
     buunshe gaalaad,  
 Bilaa laban  
     beerka kaa guba  
 Ka door biday  
     caanihii Boga  
 Ayaan basarkayga  
     bi'iyeen!

Anoo boqran  
     baalla lay sudhay  
 Bishaara qabiyo  
     shir iyo barkhad  
 Ninkii barxadayda  
     jeer badhay,  
 U gogleen badankiyo  
     boggaygiyo  
 Caw baar, xido  
     bulad xariira le,  
 Googoos balanbaalis  
     bara dheer  
 Bayluuli qajeel  
     ku baashiray,

Iyadooy buuniyada  
           badheedhuhu,  
 'Bandhigiyo kulankow  
           bariidsanid  
 Go'aan bilan  
           Eebbe kaa beer' ,  
 Bismilayn hadal iyo  
           birayntii  
 Intaanay baacin  
           kaga bilaabeen,  
 Ninkii beegtayee  
           bardaansaday  
 U soo babcay  
           baarriyada jeer,  
 Bojiyee dhegahanow  
           ballaadhiyay  
 Budh ka siiyay nabdiga  
           badhaadhaha,  
 Ballankayguna  
           buur la yahay culus  
 Ee baroortiyoo  
           boohintaydani  
 Billaahi maqlaa  
           i beer garan !

Balanbalayeey,  
           anaa ba'ay!  
 Booshaaq iyo  
           baadi bay helay  
 Bilaash-xaytayaal  
           i badhi fure !  
 Baadhooyadi baa  
           i boolyaday  
 U baylahay  
           beena-waasyadi  
 Bidaydu-ku-huurtay  
           Baandada !  
 Burriskiyo aniguu  
           baxdawgii  
 Sidii baqayaha  
           la baabaye  
 Bidhaan la arkaba  
           ku yidhi, 'Balaw'

Ku bayni-baxaye  
 bashiishtiyo  
 Kuwii baradooda  
                   baal maray,  
 Aneey i baqseen  
                   dar baaqsaday!

Baytimaalaye  
                   baqalki heeryada  
 La buubaye  
                   bidhada raacaye  
 Maruun bixisadu  
                   'baqool' tidhi  
 Dabeed ka'bul' yidhi  
                   ka boodaye,  
 Bili aanu lahayn  
                   u beer-raqay,  
 Balag looga lulaye  
                   higsaday bilig,  
 Bishoo sadexana  
                   ka beegsaday,  
 Ku bayd go'ay  
                   bayna-baynaha  
 Afkana ku bishilay  
                   burciidee  
 Bayuurtiyo  
                   boodhka xaabsaday  
 Baraaqsaday  
                   baaxad-sooraha,  
 Ayaa i bartayo  
                   i baacsaday!

Biliiliqadayda  
                   booshkiyo  
 Qabadkaa ballam Alla  
                   u baratamay!  
 Anuu binniskiina  
                   ii bu'ay!  
 I baadhatay  
                   buulalaydii !  
 I bawsade  
                   biidhiqaatuhu!

Sidii barqa dheragga  
                   adhi boon  
 Beeqaaqo sawaaqi  
                   igu badi !  
 Sidii bacadyaal  
                   badeecada  
 I baayace  
                   Baaniyaaladu!  
 Balwaday sida  
                   bilista Xaawaley  
 Bar tire ani  
                   baanahaygii  
 Ka mude bogga  
                   beegsigaygii !  
  
 Anoo balawaaja  
                   lay boob  
 Bariisada  
                   laygu baalbaal  
 U babac-dhigay  
                   laygu biya-keen !  
 Bun lay tirsayoo  
                   bes baan ahay  
 Badhkaan indhawayd  
                   ka booyaa!  
  
 Buruud jabayeey  
                   bud-dhigahay  
 Baynow Ina walan-wal\*  
                   yaw baxay ?!  
  
 Balanbalayoo  
                   bas-beelaye  
 Isagoo ku bus kicin  
                   baoor faras  
 Badh-dalool iyo  
                   boqolihii qori  
 Isagoo la balbali  
                   Shimbiri-biris,  
 Shabeel Burco  
                   bidix u meersaday  
 Bad iyo wata  
                   buuro dhaadheer



Iyaga se kamay qasnayn. May seegin marinkii. Xilk-  
 iyo siduu xeerku ahsana kamay saarufin. Tii looga min-  
 an fadhiyay, bay la yimaadeen. Ragga iskula dheeliyay  
 iyo ku kala dhaarashaddodana ula may hadhin. Guraday  
 a riteen. Guntigay u xidheen. Afkana gacantay u saareen

"Intaad Rabigiin

u soo rajacdaan

Ragow ku saliya

Rasuulkii !

Rarmiyoo, naara

oo rajiiimkana

Cadaabta ku ruuba

rubad go'e !", ugu cawdu-billeeye,  
 bisinkana ugu qabte. Ka gudbe. Sii guda gale sharacal-  
 layntii.

"Ramaaqiye ciri

guntaa ka ridiyo

Naftii isu roone

raad weyn

Rah soo fadhiyoo

riwaayada

Riyana kula jooga

reera fog,

Humaag ransadoo

rabaayada

Hadh sii rogan,

ruux dabayshaday,

Raygool fallisiyo

rish-waan-dile

Qalbigii la rigrigay,

la soo raray

Raqamkii shalayee

dib loo ragcay

Wejigii la rawishay,

la dheeh riday

Rinjigii faqmiyo

rad liin-baxay

Rubacii isu dhigay

halkii rodol;

Jalkay raagsataye

rajaysaye

Rajadu samir ugu  
                                   rukuucdiyo  
 Haadkii ritay  
                                   risiq agoomeed  
 Naftii u rushaysay  
                                   ee rako  
 Rucdigaa u guraysay  
                                   raar gacal !

Raxantuu baray  
                                   Ina Ruxaan-ruxe  
 Dhegweynta raxdiyo  
                                   rakaadiyo  
 Sida loogu rabaaso  
                                   riigada  
 Iyadoo rixinaysa  
                                   lagu raqo,  
 Raxantuu baray  
                                   Ina Ruxaan-ruxe  
 Raqleeya cukaarta  
                                   raaricin  
 Sida loogu rakibo  
                                   af rubadlaha  
 Raqiis ugu sheega  
                                   raandhiis;  
 Raxantuu baray  
                                   Ina Ruxaan-ruxe  
 Kashaan ruuga dhigin,  
                                   runtana togan  
 Sida looga 'ram'-siiyo  
                                   reemaha  
 Riigaan ka ilaasha  
                                   raasuqa,  
 Naftii rixinimo  
                                   u raacdaye  
 Rakaab-xumayaal  
                                   Ba Raaraco  
 La rafiiqdayey  
                                   raas wadaageen!  
 Ku rooriyayee  
                                   Rigaaxena

Bilaa Rajalood  
ku ood rogay!

Naftuu rasaldaar  
riddiyo dhagar  
Ramiim ka dhigay  
rasaas ganan!  
Naftii Ruuga  
raafka loo sudhay,  
Saymiyo lagu reebay  
Reer-guba!

Naftuu raran  
gaws ku raatubay  
Ka raamsaday  
rays-ma-gaadhada  
Hilibkeeda u rudhay  
sidii rucub,  
Raxan-rooxa adduun,  
rafaadka misana  
Rogaal celintii  
rakaabada  
Radeeb iyo halaw  
ku raartiyo,  
Shirkay ku raftaan  
raggiisiyo,  
Raqduu xaqlihii  
ragaadiyay  
Ruqaansi u diiday  
kala riday,  
Gartay ribdhi  
raacdadeediyo  
Taladaan la rogroginba

way ribban!", ugu caqli celiye. Kula hadle af waayeel. Waano kaga may bakhaylin. Wax-sheegna umay yaraysan. Murti bay u haaneedeen. Madhaxna way u miskeedeen. Jalbeeb muguca iyo jawhar bay ku durduureen. Way u hagar baxeen.

"Kala rooni la'aan  
rijaalkow  
Raxmadaa ka gudhiyo  
ishaa rixin,

Ma da'o roobku

daad ma soo rogo!", dhaad-dhaad iyo  
daba-dhahdiina ka dhige. Dhaabad bay ka gaysteen. Gaa-  
waha umay dhimin. Ugu dhige far waaweyn.

Dhegse looma jalaqsiin. Naani aan hadal marin,  
ayaa hor timi. Hoosba taladoodii looma dhugan. Hadur  
iyo hal-kuma-taal baa laga soo qaaday. Habaaska ka  
fara-qabsaday. Fidhadaa ka haagtay. Dayacuna wuu ku  
fidhin-bidhay. Qabar baa ku hebsaday xeer-beegtidii.  
Qoontii horaaba, tu kaloon qaban loogu sii daray.  
Akaakawyyaa qoobka loo sudhay. Qudh gooyaa loo katibay.

Afti uu habeeyoo

Wayeel hanaanshoo

Hawli ay ka gaadhiyo

Waxa bi'isay hawraar,

Tii Yoonis hebel iyo,

'Odaygaa hawaawiyay

Isagayska hawhawlee

Ku haloosiyoo jeer

Heelada inoo tuma!

Sida se way ahaan jirtay. Caalin aan laga akhri-  
san iyo arrinkeen, aqbalkeen waayayba waa buux. Guur-  
tidii golahana, xumaanta waa loo la qastiyay. Hoodh-  
kaba laguma qoysan. Ka-haybadaysigii loo ogaa shir-  
guddoon iyo u soo-joogsigii waa laga inkiray. Looma  
quudhin xushmayn. Waa laga xitiyay. La'aad lagala ajoo  
dana lali. Joogtiyo jaarun baaba looga dhigay.

Xeer-beegtiduse, meel-ka-dhacaa iyo ka xaalqaad-  
ashadiisa toona kumay kululayn. Tu kalaa shidaysay.  
Xil baa kaarinayay. Berritiyo sheeka dambay, u sii  
meel dayayeen. 'Allow garasho ha nagu cadaabin, gar  
eexana ha nagaga tegin', raggii ku wardiyi jiray,  
ayay ku banaanaayeen. Iyagaa, 'Geed tegi jiray gartii  
wuu yaqaan, laga dhiman jirayna dhaxalkiisee', isla  
sii garamayay. "May tidhi" iyo geed loogu soo xoqd-  
ay ka sii gaashaamanayeen. Gogoshana kaadi badanay,  
u sii badinayeen. Xantooda inay wanaajistaana kamay  
maqnaayn. Meesha way jirtay. Shirkaa aflaxayna kaga  
xidhnaayd.

Sidaa weeyee, hadaba, dhan kale ayay uga meer-  
een. Tir-tirsi bay ku dayeen. "Gambooley sideed

hadaw gurateen  
Gablamayaalow  
intaa guusheen  
Ganaccii golihiyo  
gankii geedkaba  
Inaa gawracdaan  
miyaa garateen?",

Ugu mude sidii mudac. Dhagaxse, tuujin iyo taabasho,  
waw kala dhig, 'baa jeer hore la yidhi. Kuway ku eed-  
aamayeenna, dhadhaabtaa waxba kamay sokayn. La mac bay  
ahaayeen. Dareen kumuu soo dhawaan. Dhawaalaba qareen  
umay ahayn. Is may sheeganayn. Dayray kala qornaayeen.  
Sarmiyo saawir bay kala ahaayeen. Iyagiyo dhaadmana  
waa horay kala dhaqaaqeen. Iniq yarina isugu may hadh-  
sanayn. Dhulkooday kala xuleen. Duul kala bogsaday bay  
ahaayeen.

*buxi*

Waa sida, oo dhalool bay waayeelku, Alla magane,  
ku dhabar jabeen. Dhego waana-ged leh, ayay dhaamin-  
ayeen. Laf cad bay toobin ku hayeen. Cidlay ka xabebsa-  
-deen. Tacab ba'ay dheh! Wax kuma toorre dheh! Taran  
laawe dheh! Tabaaleeyana u sii daa!

Balse waxba yaanan hadal idinku daaline, "Saac-  
bi-saaca weeyaan. Dibeddiyo saacad biririfa ha inoo  
ahaato. Shawrkuna inoo xidhan," in shir-guddoonku ku  
soo dabarro, iyo sangaab qabashay ka fursan wayday.  
Dan baa tidhi. Iyadaana seeta ah.

'Fardo laysu hayo

Laysuma faansho',

Lagu boob fadalka. Fasax bay isu heshay. Bankaa  
laysula baxay. Geedkii shirka gaararkiisii baa  
lagu soo galiya jabay. Hortiisaa la gabraday. Hadh-  
dacaarkiyo dhirta hooskeedii baa lays guntay. Goon-  
yahana sidii geel ka reebaa looga uugaamay. Mawdaa  
ka yeedhay!", yidhi, waayaalihii yidhi.

## -VIII-

\_\_\_\_\_ "Soomaali weligeedba, sidaasay colal kala fadhiya iyo madaxyo kala furina ugu dagaal geli jirtay."

\_\_\_\_\_ "Shalay iyo miyigii haa.Maanta se magaalaa..."

\_\_\_\_\_ "Ka Caliya, Caliyayso.Sabaaladana ku carmayso! Oday runi, run weeyaan.Dadkuna waa dadkiisii.Dib loo ma abuurin.Caawiyo berriba, geel-jirihii geelu isugu jiray, ee wada jirayee, kala jiray, baynu nahay.Taa ku biya cab.La caynad weeye magaaladuna.Waa la wada degaa, waana la kala degaa.Aragtayoo dhulkuna wuu fuudhsan yahay.Musqariyo maan la'aanna looma saarin.Xusbad baa loogu dhigay.Candhaw iyo baadi sooc weeye sida u taal.Rag baa suntaday, oo sadexa maray.Udubkuna, oday, iskaga ma dhaco.Dhalashuu igu dhacaa.Ab iyo isirra wuu gu arooraa."

\_\_\_\_\_ "Oo taa micnaheedu, adaaban kuu dhiibaye, ma in sidii xabaal iyo ninkeedii, ardaa iyo aaggii loo kala tagaa?"

\_\_\_\_\_ "Nacan Billa!'Barbarkay ka baxdaa, waa bakayla qaleen' IN lagu kala dagaal galo, warankana,'Yaa lahaayeey!',lagu dhiigeeyo,oo halkaa muran uu ku gudho, gamna hadal ku yidhaahdo weeyaan.Maxayba u kala lulan ama ay isu huursan?Wakaa cadawgii!Weerar iyo wejigoo lagu diiraa inoo ballana.Burdina, ardaagii ka baaqsadaa leh!',in juuq iyo jaaqba lagu soo af jaro, oo waxay sheegataba ha waydee, lagu shareero weeyaan!"

\_\_\_\_\_ "Deetana, iyadoo farraarale, oo sidaa u kala socotoo farandilaynaysa, oon midi, mid ka haysanoo qamaamaysa, magaalada ay isugu soo gasho..."

\_\_\_\_\_ "Cunsurtii Faqashkana halkaa aynu kaga faataxay-sanno!"

\_\_\_\_\_ "Hambadeedana aad ku sii axantid?"

\_\_\_\_\_ "Waxba god mulac haygula meeraysan!"

\_\_\_ "Hubsiiino awgayow, hal baa la siistaa. Lama gawaan raaciyo. Cagtaa loo dhigaa."

\_\_\_ "Sheeko! Jarco laygu tumiyo, oday, tashuush laygu furaa ima nashuushadeeyo. Hortaa jiraba i karsiin waa. Arkaayoo adigana, war la'aantii col hoday baa ku haysa. Qalaxdiyo qalam-jalamtana loox yaraa ku qalin-daar ma. Gankaygiyo maaha tima-garaw lahayгаа!" isla soo gindhidhi Shide. Xirriba dheerina, halkeeda weeyaan. Kolayba se, madaxuu farta ku goday, ee uu hoos u soo yar foorariyay, Wali Alluu ahaa miday ku falaaday cirradu.

'Guud cad baa isa ba'ay! Maaha kii la yaqiin. Garasho aadiyo garaad saayida daayoo, da'na haatan ma sheego. Maqaskaaba cadeeya!' Sigadna hoos ugu faq. Galool jirridiisa ku tiirsanaa buu dhabarka ku sii dhereriyay. Gadhkana laba, ka-sadex jeer ayuu gacanta sidaa iyo sidaa u dhex mariyay. Aamus yar dabadiina, kaftan-dhabluu ku yidhi, "Awgayow madaxaagu, inuu xoosh yahay xagaasaday, waan arkaa. Hamaynuba se haynay tiisaba?"

\_\_\_ "Anoo kale oday, looma duur-xulo. 'Ciyaala amis' iyo ma ihi adhi carbeed. Hay moodin waageeni. Ayuha-nebi galtiyana, yaanan kuula ekaan. Soomaali il-xay-iigna, aabahay baa ka dhashay. Adigu iiga warrami maysid. Anaa kaa aqaan. La uunyooba, dheg keliyooy wax ka maqasho ayuun bay lahayd. Ta rijaalal qabaa'il ka iyo ardaayada weeye, taasina. Waa ka dhalan. Dhaqan bay u leedahay. Ka-awow, ka-awowna sida ayay soo ahayd. Annakaa axadhnay, oo tuujinay adhaxda, ishana farta ka soo gelinay. Hoodeeda, hiilkeeda, iyo hilba dirirkeedaba, ardaa baa loogu tagaa. Ninkii la-hal-maalayee, yaqaanaa hundaheeduna kama gedmado. Geedkiy golaheeduu is-geeyaa. Agnaan se ka ambay. Ayri go'an afka saar. Firigeedaba meelaan loo filin ka yaahi. Nuudhigeedana ka yaboohi. Looma se qorin. Cidliyo, is-agoo fara-madow ka joogaa is-leh.

Adna, hubaayoo, sida qaabadiisii baad qabar maah u tahay. Tuu ku caana maalayee, raggaad ka-isirawdaa abidkiiba ku cad-goosan jiray ma haysid.

Ka tegtay. Jookhana tu aadan agasba u lahayn, baa lagaaga lulay. Tallaaba sadex yaa ku lumisay. Waa lagu sitaa. Meel baa lagaaga yeedhanayaa. Meheradna midayn iyo wax ciil kaa dilaad ka dhigatay.

Walle waa yaab! Bal dagaal baad u ol-olaynaysaa, hadana, ardaayadii war-galka u ahaa, ayaabad ka tagan tahay. Lagu tusi waa. Ma arkaan indhahaagu. Wayba dha-afsan yihiin. Qar baad jafaysaa! Maanagaa waalan, mise tolow..."

\_\_\_ "Kollayba, Cadan waa laga heesayaa. Anse taada kuu raacee, kaba soo qaad, iyadoo sideedaa u kala gabaa-rra-gurdaynaysa, oon, ardaa waliba inuu aaggiisa ku qaato shafka, kana soo faraxasho, wax ka sii shisheeya isku ogayn, in garida loogu dhufto, 'Boobaayna' ay ka dhacdo. Bal se kala-hororsi iyo hoosh waa halkoodde, haduu awgayow, madaxii baanka furtaa, wuxuu ugu tago u dhigto afka; oo kii dekedda ku nasiibsaday, uu la hor fadhiisto Baraawn, kalax kaloo la darana uu ka xila furo; oo gegida caalamiga ah iyo garoonka dayuuradaha ardaagii qorigu ugu dhacay, wax ka duuliyo wax ka soo degaba, markuu doono, ku dab-xidho Taranta-sete; ka id-aacadda afka dheer ee sadexda mawjadood ka hadasha hantiyee, hadhiinaysta maxaad ka tidhi?"

\_\_\_ "Iska biya-dhac, oday?"

\_\_\_ "Waa hagaage, haduu ku yeedhiyo, oo uu labada nis, ka hore, 'Iyadoo tuban  
 Toodho wiiley,  
**Tala-xumihii**  
 Af tumaatile  
 Kolku Teeyoy  
 Ku taftaafee  
 Tunka kaa koray,  
 Qaash tumaaliya  
 Oo ku tooboo  
 Kugu talax-taga,  
 Kolku taagii  
 Iyo tabartii  
 Isla tigayuu



Teeyo halistiyo  
 Tarta kaa sudhay;  
 Adna talalkiyo  
 Tola'aydiyo  
 Taaha lalisaye,  
 Tambal liitiyo  
 Tirsi-laawiyo  
 Fule kaa tegay,  
 Tookh bilaashlana  
 Tubta nuugee  
 Toonka sii xulay;  
 Anaa Teeyoy  
 Turuqayгаа  
 Gaashaan teeriya  
 Kaaga tolayoo,  
 Meeshu tarab,tarab  
 Meyd u tuuraa  
 Tagooga orgile  
 Iska tumayoo  
 Tiira dheerloo  
 Toora-tooruhu  
 Soo tufoo jeer  
 Qashar tuurya a  
 Soo tartariyaan  
 Kuu turqadayoo,  
 Kolkaan taabteen  
 Keebka tuujaba  
 Takar dhabashada  
 Diilin taxan iyo  
 Teembo boqoloo  
 Tusbax go'ay sidi  
 Isu daba taal,  
 Oo tilmaantii  
 Tayse hooriyo  
 Tahan jeegaan  
 Iska taagtoo  
 Tafta xaydiyo  
 Tus hillaaciyo  
 Tiriig mooduu  
 Teedinaayoo  
 Anaa Teeyoy  
 Togtayoo dirir  
 Awgaa tiimbaday!

Taynu joogniyo  
 Badoo teerliyo  
 Tusmadii bari  
 Socod kaga timi,  
 Taaka la arkana  
 Dhulka tooxii  
 Tarshad lulataa,  
 'Wuxu taaraa  
 Geesku waa taxad!'  
 Geeraar tiiqsiya  
 Oo tanaaga ah  
 Kaga turubtiyo,  
 Hirkoo tiigaal  
 Iyo tamashlayn  
 Cirka ugu tegay,  
 Oo todoba baxa  
 Tantanida sare  
 'Isa sii taag',  
 Ku tallamayoo  
 Weli tooraha  
 Sii tafaayoo  
 Toobiyaystiyo,  
 Sidi carra tuur  
 Soo tallaabsaday,  
 Ama Teeyoy  
 Tog faruurmoo  
 Xakab iyo teed  
 Iyo takhalkii  
 Ku tikraaraa  
 Ka doc-tuuriyo,

Daruur tebisoo  
 Midhif tiratood  
 Moodo tima-yuluq  
 Miid taraaraha  
 Loogu tiirshayo  
 Tiin dhaaf awgii  
 Tukubaysiyo  
 Todob heegada  
 Xareed talalaxo  
 Tif ka siiyayo  
 Goor talaada a  
 Kaga tumay boodh  
 Tabnigiisiyo

Tiixa roobkiyo  
 Rag tamuuxoo  
 Rabbigay taran  
 Taajir kaga dhigay,  
 Turaabkaa soo  
 Tin,tin loo guray  
 Oo tolkayaan  
 Ku tanaadoo,  
 Teeyoy anigaa  
 Malyan tababaran  
 Ku tar sheegtayo,  
 Tab dagaal iyo  
 Malyan taatiko  
 Ku tacliin dheer  
 Oo tadhahayoo  
 Weerar taabuda  
 Nin ka toydoo  
 Ka tallaashoo  
 Tuuga mooyee  
 Nin is taawiyay  
 Oo ku tiigsaday  
 Been tarjumayoo  
 Is tafaafule  
 Wayska taamaye  
 Inuu tuhunkaa  
 Tudh ku siiyaa  
 Ku tiniixigay  
 Habeen tegay tahay,  
 Anaa Teeyoy  
 Rag ku tumayoo,  
 Taygarnimadii  
 Anaa taaboo  
 Isla tooxayo  
 La taxaashoo  
 Ku Talaahigay  
 Igu tolanoo

Taashku ii xidhan!", kaga hiddi-waaso, gelinka  
 dambana, 'Fidhiidhii, oo fidhiidhii  
 Anaa faanaye, fidhiidhii  
 Fudkana dhigayey, fidhiidhii  
 Ficiisnimadii, fidhiidhii

Anaa u fidhaye, Fidhiidhii,

Fidhiidhii oo , Fidhiidhii  
Kolkaan foodhyana, Fidhiidhii  
Inaad fayshaan , Fidhiidhii  
Fadhiga laashaan, Fidhiidhii  
Ayaa faralee , Fidhiidhii,

Fidhiidhiyeey , Fidhiidhii  
Fidhiikhdaydaa , Fidhiidhii  
Cidaan fulinayn , Fidhiidhii  
Ayaa faqashoo , Fidhiidhii  
La foocinayaa , Fidhiidhii !',uu kaga hiddi-  
yayleeyo, saw qushigii maaha?"

\_\_\_ "Wababacaley! Afkaba way ka weyn tahay! Miyir daa-  
yoo, iga wallaanu, waalina ugu dhicin! Alla faan  
badanaa! Carkee?"

\_\_\_ "Oo yaa u diidayo, qabanaaya afka?"

\_\_\_ "Maba dhalano, dhawrtaysan ogaa! Oo raggii la lah-  
aa iyo geed-labkii maye? Hadmaa lagu daray xaawaley-  
da dumar? Goormuu se ku hubsaday xabaalaha?"

\_\_\_ "Bal adba?"

\_\_\_ "Iyo tii xilood in ta ka gaadha, iyo waraqda ka  
yeedha, tan iyo Idaafayta laga bixi dayaankeeda!"

\_\_\_ "Waaraa gaadha, waaga berigiisa. Taad ka fali doon.  
to iyo xila furkana waan kaa guntay. Amaano weeye,  
aan kuu hayo. Xil baan iska saarayaa. Markiyo meesh-  
eedana, inaan kuugu la soo xaadiraad iga taqaan. Lay  
ga waayi maayo, Shaa Allee, iyo hadaan geeri moogaha  
Adaan se awgayow, ku su'aalaye, gari yay taqaan?"

\_\_\_ "Alle."

\_\_\_ "Qori tuur dabadii, in lays qurdiyaana?"

\_\_\_ "Qiil la'aan baa la yidhaa."

"Maragaa jano, maalin aakhiro."

"Aamiin. Malahase minallaahi kaama ahee, muraadka?"

"Iiga qaado muquuno. Ana falfal iyo far geedaysan sideed mid baa iigu filan. Adoo qalay oo ardaa iyo aag ku qaybiyay, oo haan waliba qusumkeedii, 'Iimaan Allaa uur buusha', ay kula carawday, oo lala kala fulay, ka daba teg inuu hadhan yahay, talana ay fayo ka haaday, kol hadaad qirtayoo, dibnahaaga laga helay iima hadhin aniga. Way i kaafiday. Faladh baaba, Allaa faxane, iga hadhaya."

"Maanaan garan, geela doofaarku laayay! Goorahanba, waxaad kola, 'Haduu goray diin

godkii galo  
 O diinkuna goray  
 godkii galo', ugu gun-  
 uusaysay, kola aad, 'Haduu gebigaba  
 yidhaa goob yahan  
 Anaa gudanoo  
 goboo keligay  
 Is galaalayo jeer  
 ganaanaday  
 Aslayoo garawgii  
 guduudaye  
 Intii laba garab  
 ku gaadiidiyo  
 Guntiina kalaay  
 gondaha dhiga!  
 Galaydh iyo haad  
 dhammaan gidigiin  
 Guraan-guradow  
 guddooma warkoo,  
 Gadaafadu ani  
 gartay weeyee  
 Badh haan guntadoo  
 badh haan gogladee,  
 Anoo geya baa  
 u geed-fadhiyee  
 Go'ooyin baalashiina  
 soo gurbiyoo

Iyagoo garanoon  
gantoobnayn

Waa inoo golihiyo

gadiidkii !', ugu googaa cigalaynaysay, inaanay wax kale, kaa ahayn, amba waan malaynayay. Ma dhukani oday. Hadalkuna shan-shub iima dhaco. Adse mooyidaa. Afeefna, af jooga looma adeegaa iga ah. Qal-inka ku xad, riyada ah se, inaadan ka waantoobayn, ayay iila badan tahay. Waa se yeelkaa. Adaa cirka roob ku og. Anna indhahood gudcur ku cadaysay baa lay tusay. Meeshana, wax rag loogu maah-maaho maahee, inankii, inanta ku yidhi, 'Aan wada taleejino', ee iyana, 'Siba uma wada naal', ku tidhi, murtidii ahayd baa igula xadfan. Geel dar u horidaydiyo, goroyo u heeskaaguna la dhaglân weeyaan. Wax badan bay wadaagaan. Waayo, dhankaan ka hadlayeen ka haaneedayba, ula maad dhaqaaqin. Cuyubkaad u celisay. Dhengedana gudub iyo 'Aabahay gablan' baad ugu dhufatay. Waaba se kaaf iyo kala dheeriye, qorshe dagaal iyo ardaa waliba aaggiisa inuu qabsadiyo, bal maxaa isu gelay dhafoor taabashadaad ka siisay dhakaw? Xaggeed se rag dhiig iyo uus lehooy u dhanaan tahay seediyoon dhiman, oo nolosha lagu dhaxlana ku aragtay?"

Sigadna gole-ka-fuul kaloo, intuu Shide iskala gurayay, uu maanka ku sii qalin-daraaleeyay, buu u dh-iibay. Goguu u geliyay:

"Hadii umulaha  
ilawsha dhawaan  
Asalkeeda banaan  
ab loogu ogaa  
Bal inay af-damiyo  
ammuuri dhacdayo  
Qalbigu ummadii  
abaarsaday  
Tagtiyo udubkeed,  
aloolkeed  
Aboor liqa  
uurka loo dhigay  
Dadkuna awgayow  
xusuus ka araday,

Alifkii shalayeen  
                   khadkiisu engegin  
 Inuu abidkiiba  
                   soo ag mariyo  
 Ma moodid ayaan  
                   inay is-arkeen!

Illeyn talo,  
                   'Waad il-duuftiyo'  
 'Oohow' ma tidhaahdo  
                   aadmiga!

Illeen garashadu  
                   daday oontayo  
 Asqow noqotaa  
                   afkaw dhacay!

Awaashu wadeecaday  
                   ambisaye  
 Wadada ayra-goo  
                   ka sii oloshaye  
 Aroor ku ekaysay  
                   abataqan  
 Allay leedahoo  
                   uruurine,  
 Wax baa indhawayd  
                   ka soo alag lehe  
 Eebow sahal  
                   awrku na buub!

Inaabsadayeey  
                   'Ax'iyoy'Way'!  
 Col soo onkodoo  
                   aweytiya  
 Allow araraha  
                   ibtila kale!

'Ardaa iyo maanta  
                   waa aag  
 Berina anafiyo  
                   inkaar ma le'.

Dheg-dheer alwatayo  
     arligu nabad'  
 Haduu awgayow  
     ku siiyay aqligu,  
 Belaayadan cogan,  
     eelkuba  
 Awowgood la naar  
     halkay awal  
 Ka soo unkameen  
     il-fuuradu!  
 Intaaney aramidu  
     gulcubo ugub,  
 Uluuf ka uluuf  
     ilkaystayo  
 Iyagoo ordi  
     adhax ka soo dhacay,  
 Iniina biqlayo  
     abaydina  
 Akaakoobayoo  
     asaasaqay,  
 Intaaney abur dhalin  
     asay xidhan,  
 Aasaas iyo unug  
     halkuu isir  
 Askunkeedu ka yimi  
     asmada baas!  
 Halkay ablacduna  
     abraarkiyo  
 Aguug kaga timi  
     utumaley,  
 Ka soo afar-qaaday  
     aafadu !  
 Adoon dib-u eegin  
     aadkaba  
 Is odhan awgayow  
     ablayn ku day  
 Bal sii axadhoo  
     abkeed doon,  
 Ka qaadin aftina  
     ayaamaha,  
 Hadaad odayayn  
     u soo ilatood



Ku tahay arrinkeen  
                   itaalkani,  
 Adeeg Alla  
                   oodu noo rogan!"

— "War bal dhega  
 Hada dhaha!  
 Hadal dhiga  
 Shiba dhaha!  
 Dhul gariirka  
 Dhegta liga!  
 Yama dhaha  
 Yuuqa dhiga!  
 Dharraqaanka  
 Bal dhegaysta!", intuu qaarka sare ku waydhaami-  
 yay, giirkana jidhif ka kiciyay, ayuu Shide-durdur ku  
 qawdhamay, "Dhashayoo weli  
                   Dhoobadeedaa  
                   Intaan dhereraa  
                   Een dhex taagnaa,  
                   Dhaartayee tani  
                   Way dhinaydoo  
                   Dhegtu may maqal! Yaa? Yaa? Lababa isa saar-  
 ayoo, weligay iyo waaqay laba tagoogo isma saarin!  
 Wow! War maxaad hadashay? Yaa? Show gadhkuba oday  
                   Gadhkaan moodiyo  
                   Gadhkii maahee  
                   Gadhkaad sidataa  
                   Gadh u yaal iyo  
                   Gadh kaleetoon  
                   Gadh ahayn iyo  
                   Gadhku waa kii  
                   Gadh-malaytaha! Wow! War  
 illeen, anagaa yaab aragnay! Yaa? War maxaad tidhi?  
 Yaa? Miyaad falantoo  
                   Fiira laawow  
                   Fagadh baa tahay? Yaa? War goormaan, gablame, gacant  
 kuu hoorsaday? 'Adeeg Alla' iyo waxsanalladuna xaggay  
 iiga timi? Wow! Wax-walbaale adduun  
                   Walcantii ha go'dee  
                   Wejiyaal badanaa!

Yaa!Abbow tanoo kale!War miyaan ku dawarsaday?Maxaad se 'Calalla' ku keentay?"

\_\_\_"Awwayow adba ii maad yaraysan.Hadaad se gansatay, oo ay si kale kuu roortay waa iga xaal gole-jooga."

\_\_\_"Xaal iyo Caliya lahaane,oday waa ku sidee?"

\_\_\_"Sina."

\_\_\_"Nala galee, oo geelayaga la qaadee inaan kollaba sidan ku qummanayn!Wax weyn baa oday si kaa ah.Ma saaloonid.Aad baad u siyaysan tahay."

\_\_\_"Alla mahadii weeyoo madax i xanuuni maayo."

\_\_\_"Hadaa oday, meeshu waa oomane Hawde ma ajaa ku madax-martay, mise uus-miir?"

\_\_\_"Waxay kaa tahayba waa maya.Hanfigii kal horiyo  
 kulaylkii  
 Kaliil dabadeed  
~~XXXXXXXXXX~~  
 haraad kalifiy  
 Noo muu kadin  
 Eebbe kaar kale."

\_\_\_"A'aa!Ma cadcada!Hadalkuna run kama maarmee hadaba,caana waaye miyaad gaaska cabtaa?"

\_\_\_"Allaa qadaray!Bal se awgayow raguu maydku ke siibtay, 'Hadduu sii go'ay' saw laga ma werin?"

\_\_\_"Wegereey, weger!'Mayd maxaa u dambeeyay?' iyo 'Kaa la sii sido' ayaan maqli jiray!Immika..."

\_\_\_ "Afkaaga Shidow, caana lagu qabay. Sursuur oodan hadalkuna x yuu innaga galin. Ma se xuma wax is-weydiintuye, qusumkiyo ardaagan aad mooya-qooqaaratay, ninkii kugu qabtaa asalkaba ma nin qaadan baa?"

\_\_\_ "Oday ina rag horaa loo yidhi, lama maleeyo. Afkaygana, runtaa fiicane, kollayba khayr badan oo xaggaaga ah kuma ogi. Waayeella, 'Nimaanad saacad ku baran, sannad kuma baratid' baa laga hayaa. Al-qasti, shalmadi koore raacdaye, maxay kula tahaydu shaki weyn bay leedahay. Laga ma dhadhawa. Waana halkii wadaadkee, 'Fiihaa laaq-iyad' weeye, oo far baa iigu godan. Xuuraankuna ogi, oo kea Lillaahi masha. Qardoofaad ka wadaa. Waana kaa oulqulad oday. Anse ii dhuuman mayso, oo hindhisi maayee waxba sanko hayga qorya-qoryayn. Eray aad i daba-qaadaana yux iyo sun buu kaa yahay. Hayga sugin. 'Waad soo ajaysatay' iyo 'Wax baad ku soo dhufatay' toona kollaba carrab aan leeyahay ~~xxxxxxxxxxxxxxxxxxxx~~ inaan ku ballaadihiyana oday haka yaabin. Kuuma odhan hore. Eeggana ma damacsani. Is-dhaafse, aakhiraa meel la tego leh, indha laga cabsoodaana Ilaah bay ku yaalaane waan kaa hayaa!"

\_\_\_ "Eebow garasho!" iyo gacmaha oo uu samada u hooriyo intuu Sigad isku daray, ayuu raaciyay: "Shanta udubee tacdaar wadaagta leh hal shanshaa ~~xxx~~ ka baxda, shantaan lahayna shanshaa ka baxda, saw Shidow lama odhan?"

\_\_\_ "Bal wad."

Sigadna umuu labayn. Wuu ku dhaqaajiyay. Wakhtiguna maan la'aan meel umuu liqdaarayn. Kamuu oolin jidaashii. Awgoodna umuu laba-diblaysnayn. Intay isku jireenba wuu cidhibsanayay. Laba-lugood falfalka kor ugu sii laameerinaya ayuu ahaa. Jid-marna saacadii birifta loo seeray baa u ahayd. Xagga bari buu ka-laba guray. Intay Sigad iyo Shide ligliga is haysteen, afarta geelna a

boobayeen ayuu ka adeegay. Wuu halaloobiyay. Iyaguse haabkaba kumay hayn. Tiredana ugu muu jirin. Iyagaa isku jeeday. Tu kalana kan-shaba umay lahayn. Way isugu jirtay. Baanisada kala-gurashadeedana kamay badinayn. Haaneed-keeda ayuun baa is-dhaafayay. Laba ka-dhex-eeyuu ahaa. Dhinacana kolba midkood bay saaraysay.

\*\*\*

\_\_\_ "Waji Alloo abraara, manaamkana Looxal Maxfuudka ku daalacda, oo la weheliyoo qu-ruumo u soo warramaan kugu maanan ogeyn! ~~Si~~ Salallaahuye nebi Maxamed iyo Caleehi salaamka dabadiina, kolba anigu qof baan ahayoo, Waxyi soo degay ku dambaabi maayo. Rag se war baa isku dara, dumarra sheekee, oday ha lagu maqlee goormaa horta lagu kh-aliifay?" dhoolaha intuu Shide ku cadeeyay, oo uu isu rixiyay buu dhag-dhag lagu ladhan yahay ku dhuftay. Raxdiyo rakaadiina loogu ma tegin. Dirkaba isagaa isu lahaa oo is-daba dhigay.

'Indha adag arooskeeday ka boodaa!! Isma arkena islaankaba laa! ugu soo hal-qabo,' iyo 'Ka daa immikuu sidii dhuxun-ku-reebka isku soo dhagiye' ayuu Sigadna ku yar tal-lamay. Nebdiguu kaga tashaday. Si ka ladifan inuu ugu dhigo, ayuu se ka wadi waayay.

\_\_\_ "Malaha awgayow dheh ha laga sheegee inuu hadalku inaga noqdo, laga roon. Nur ma laha. Nah iyo damcad toona loo ma oga. Darroorri baa la yidhaa. Tarantiisuna, lagu go'a waxba inoo aabayn mayso. Carrab jaynafa iyo jidiin cad-aada ayuun baynu ka mullaaxsan. Ujeeddiyo ha-atanna waa maya. Waxyi igu ma soo dego. Uur-ku-baalle maan ihi. Garab-daarra kumaan and-acon. Qof ~~qof~~ caadiya, dadkiisana isk-aga dhex jira ayaan ahay. In i seegtay waa

buux. Dofa ruqeeniyo isha inaga laalaadaa se  
 dhukanaani ha joogtee war iyo wacaal sheegba ~~xxxx~~  
 inooga badan. 'Arday baynu nahayoo  
     urugaynu baranaa,  
     umal baa inoo dhiga!  
     Waynagu amaahoo  
     xanuunkii adduunkaa  
     ergis inagu raacoo,  
     gashi baxa amaanadu  
     iba-goror halbawliyo  
     waa dhiig ujuuradu,  
     asli xawda laga dhuray!  
     Af-cas weeye gaawuhu  
     Aalamaan la hoos galo!' ayay goor  
 iyo ayaanba ku uubateeyaan!

Waxba se yaanan aramida, uur-ku-taaladeeda  
 sii hiban. Qaan weeye inoo maqan. Duugoobi ma-  
~~xx~~ yso. Lamana deedafayn karo. Sii candhawgeed-  
 uba se inuu markan i kaariyo maaha..."

\_\_\_ "Waayo? Miyaad ka hadhay?"

\_\_\_ "Maya. Meel baanse ku ogahay. War-ma-qabtada  
 colkii inagu galay baana inoo haya..."

\_\_\_ "Taa oday, cidna loo sheegi maayo. Waa laga  
 dheregsan yahay. Ciyaalkiyo caanaleyduba way  
 ogyihiin. War la qabaana xiisa ma leh, baa  
 lagaa yidhi. Hebel iyo astayntiisana waxba ha  
 ku haraadin. Sababtoo ah, nin is qariyaba maaha.  
 Hanuunin ku-sheeg, xafiis loo shaqa tego, iyo  
 cooshad meherada daayoo, kaabad la arkaba wuu  
 ka soo shaf ballaadhan yahay. Taaka, taakuuba  
 sidii Cabdilqaadir, sawirkiisu gayigaba ugu  
 jiraa....."

\_\_\_ "Gartaye, awgayow, inta godobteenna u qo-  
 olan Habaar-biirayoo kow ka ah iyo...."

\_\_\_ "Aataan!" iyo faruu ligo, ayuu se Shide  
 isku mataaniyay. Goonyahana hanjaleeladuu sidan

iyo sidaa ugu baalbaalay. Wuu iska hubiyay. Jeer-kaasuu afka u soo yuubay, oo vidhi, "Oday hab-eenkii hoos baa loo hadlaa. Maalintiina har-eerahaagaa la eegaa. Ay sababtu tahay, meeshu waa facshar. Wax-walbaalaa isha miirta ka dhigaya. Loo-ma-ooyaanka dhex midhiqshaanlaynay-anaa cadad ma laha. Way isugu soo gashay. La xidhi, 'Shirna looma wada uunsiyo!!' Afke-ennu se waysu amaan, oo waa innagiye..."

\_\_\_ "Innagaa?"

\_\_\_ "War siduu yahay!? Innagii, oday, innaga ahayn ee...", intuu Shide candhuuftii dib ugu liqay, margigana uu soo dhudhumiyay, ayuu dhegta u saaray, "Labadeenna ardaa, inay hab-een iska xigaan kuwa kale malaha lama soc-otid?"

\_\_\_ "Yaa!?"

\_\_\_ "Show Almadar iska weynaaday baad tahay, oo qabar-daarnimadu waa kaa dhab!... Mise anaad indhaha, waxba kaa garan maayee, ii ciidaynaysaa, ood isu kay carrab tiraysaa, hunnu' aan wax ogaynna isaga kay dhigaysaa?"

\_\_\_ "Waa koow? Malaha ka-sii ardaayaynu isla nahay?"

\_\_\_ "Qidhim laga siigu xagguu noogu sayaxayaa?! War codka dala' ka dhig baanu ku nidhi..."

\_\_\_ "Alla awgayow, diina badnidaa!"

\_\_\_ "Siyaasi baanad ahayne, oday, sir baa la yeeshaa."

\_\_\_ "Eebow adaa weyn! Oo awal ma midabayn iyo muuq-shabeelayn bay siyaasadi ahayd?"

\_\_\_ "O hadaa hee?!"

\_\_\_ "Ma Allaa kugu og?"

\_\_\_ "Run iyo dhaar, oday, isugu kaa dari maayo."

\_\_\_ "~~Xix~~ Xiniinyaha maarre..."

\_\_\_ "Kaaga dhac adigoo karaamiyo tuf midna ha yeelane habaarka naga daa!"

Irkig weji la uruursan, salaantana, "maansa isla keeni waynay! Show afar-kaboodle muudaaya baad tahay!" ay kaga qoran tahay ayaa ka soo hadhay Sigad.

\_\_\_ "Oday sidii dameer masaajid galay maxaad dhegaha la dhisaysaa?"

Gadhuu maah salaaxo, indha soo maqan oon libiqsanayn, iyo aamus buu ugu jawaabay Sigad. Shibtuu u galay.

\_\_\_ "War bal qasuubadan kaalaya! Oday ma surucyaad leedahay?! Sidaadan i arki jirin se maxaad isha iiga dusineysaa?!"

\_\_\_ "Jirtoo waa halkii Dun-carbeede\*, 'Ma hadhin, hadal lays yidhaahdaa'! Afkaygaad se kala baxday."

\_\_\_ "Maxay?"

\_\_\_ "Waa lagu yaqaan. La mood noqon se waa, awgayow, ma maqashay?"

\_\_\_ "Wali Allee, ujeedkaa?"

\_\_\_ "Kuu sheegaye, Shidahan mudh igu soo yidhi umean daban. Wuuba ii hor leeyahay. Aragiisana hadduun baaba layga tiriya!"

\_\_\_ "Ninba oday wax is leh. Ree magaal birta calashaday, baddana galayl kaga soo baxay, iyo haameen lagu jabay oo madaniyaan amba kuu haystay! Inaan se, al-qalad marjuuc, baa la yidhiye mushteegayoon is-moodsiiyay baa cayaan iigu muuqata..."

\_\_\_ "Sheekadaad ku darsane, awgayow su'aal?"

\_\_\_ "Soo daa."

\_\_\_ "Gartay, oo laba-dublayntaad u taqaan siyaasad. Ishiyo uurkoo la dabo, iyo sarriigasha la'aantana, gartayoo reer magaalnimaad u haysataa. Adlee se waaye. Waxaad ka heshana waxba hayga siin. Wax se aan garan waayay, shinkastoon ka yar halacsaday sheed, in halganka hubaysann iyo falsafadaadan LABA HADHLEYDA ah oo laysku badhxay, candhadana laysu galiyay, uu dagaalkan ardaa iyo aagga ku fadhiyaa ka soo jeedo. Hadana awgayow weli waa igu heedh-heedh, oo wax badan baa, balam Alla..."

\_\_\_ "Kuma dhaarsan anigu."

\_\_\_ "Hawraarsane, duulaan ardaaga bal iigu hako, halista ka iman karteen maantoo dhan farta kuugu godayay iyo sidaad uga gaashaa-manaysana, awgayow, bal hada ii yar ballaadhi?"

\_\_\_ "Oday hawii horaysee, fulaan, fulaantiyo wax baa fallisiyo laba hadhleyda aad isu kay dhex dhigtay waxba kaa odhan maayo. Waayo, Soomaali baan aad u bartay. Runtaa loo sheegaayoo, sidii abeesadii farta loo taagay bay fanaxa u boodaa. Niis weeye, oo laga na gayoodo. Afkay weligeedba isu jaqdaa ..."  
 XXXXX



\_\_\_ "Ismana indha buuxiso ku dar."

\_\_\_ "Liksacaad oday, adigu u leedahay. Anse waan soo waday. Carrabkayba iga saarayd. Waayo, hidday u leedahay. Hoodana way ka talisaa, oo wanow hadal bay taqaan. 'Car yaa u taliya oon bir kaga adeegin, waranka caaradiisana isa sima ku odhanna', lays kama odhan. Bilaash hawraartu umay bixin. Budh-ku-maal inay leedahay baa la soo ogaaday. Tu loo noqonayana maaha. Sharribaad bay ku timi. Horaana looga soo kadeed beelay.

Tan iyo su'aashana, eray dhaan wadaan kaaga celiyay. Oday dagaal sidiisa banaanba, waa belo. Belana lama sahansadaa la yidhi. Sac rijaal iyo ku dhardhaarid buu wax ku leeyahay. Looma labeeyo. Labac, labacdu uma sama. Shir iyo midiri eeshna kuma galo. Wuuba ku gole haawadaa. Aniguna oday, 'Maxay kula tahay' iyo miki, miki tinnaaga ah toona meel uma hayo. Saacad baa iga dhacaysa. 'Wiideedaan' ka gaa-sii is leeyahay. Arrimuhuna sida hebelo qaar-kood iiga ma qasna. Way ii kala horreeyaan. Maantiyo Tun-ku-shaashlaha rididiisaana ii daran aniga. Falawga ugu dhakhsaha badan een dhebiga ugu qorayaan eeganayaa. Sababtuna waxay tahay, mudnaanta koobaad buu tu walboo kalaba leeyahay. Halkay ku gudhiyo waa hal-doorkii. Hanashadeedana, jananka qoortu cad-aatayoon afka dhulka u galiyaa iga xigta. Damiin se far waaweyn baa wax loogu dhigaaye,

'Hadaan legdo

baalku iga ligan

sidii laf-dhan

baan garbaha luli

laabtaan sudhi

luulka geesiga

foodhi baan sida

loodhka laasi

laashin baan noqon

luuq ku hoobala!' ninkii yidhi

baan meel la joogaa. Sina noo kala wadi maysid."

\_\_\_ "Af waa kane, may lagu aame, ayay Dhoobayda webi ka yidhaahdaan..."

\_\_\_ "Wadh, wadh! Oday amag-amag iyo amuuro lahaane, ma markaagiibaa?"

\_\_\_ "Maya."

\_\_\_ "Madaba dadaanaan is agoon afka haysu kaaya galine, af muslin ku hadal."

Sigadna intuu indhaha ka yar bilig, bilig-siiyay, sar-wejigana uu sidaa u soo toobay, yidhi goortaa, "Yeelaye dhuq-dhuq hore, inay awgayow dhabanna hays dambe leedahay ~~xxx~~ ma dood baad ka qabtaa?"

\_\_\_ "War sow sagaaro ima barataa, walba hebel Cayme, laga sheegay! Oday hadal ima dhuunto. Siduna maah-maahdu siday ku baxday maaha. Waaba kala haab. Adse kaa magan, oo maad garane, dagaal iyo gees lo'aad baa is ah. Lab-adaba kulaylkaa ~~x~~ lagu gooyaa..."

\_\_\_ "Doobir! Awgayow durduraddadiyo isma oga daluumuhu!"

\_\_\_ "Wagagac! Oday dhego ma kuu daloolaan?"

\_\_\_ "Waan is leeyahay."

\_\_\_ "Guugaa, guugaa hadaba widi maantoo dhan wadi maynee hal iga gunud. Immikiyo hadhowba ardaa iyo aag bay iigu go'an tahay. Kun haday ku kufriyayso, kuna ku muslimayso, kollaba ninka ka tanaasulaya maan ihi. Berritana callaheeda. Waxay la timaadaba, la arki doonee. Waa se hadeede, ha la gaadho kolka hore!"

\_\_\_ "Oo Shidow sidaasi miyaaney ahayn..." intuu ku dabraday, oo uu wejigii guntanaa yar debciyay, gacantana xoonkii haraadku waday, ee qoysankuu uriyaba afka kula aroorayay uu sidaa iyo sidaa ugu balfiyay, ayuu Sigad ku muunsooday

"Ninkii duuliyenimada laga raacay iyo sheekadii-sii baan soo xasuustay."

'Baxay ahayd?' iyo 'Waa Ina ayo?' tooni kamay yeedhin Shide. Indha balacsan iyo aamus buu se ugu raariciyay dhegaha.

Shaarubtuu, mar iyo laba, Sigad miigay. Ku ye goortaa, "Maruun dayuurad inuu samada u qayraamiyo, dhulkana uu hoos u soo eego, ayay ninka, sida la sheegay, ka qabsatay. Maalintii wuu ku taami jiray. Habeenkiina wuu ku hadri jiray. Way kaga dhegtay. Aad buu uga daba dhacay. Jiif iyo joogba way ku hor taagnayd. Kanigay kaga turqanayd. Faras buu ugu joogay. Lug buu ku raacdaynayay. Kabaha kaga dhammaaday. Alla magane, wuu u dhogor go'ay.

Wuxuu se gebi dhacleeyo, oo uu geed gaaban is-ugu taago, ku dheerra uu u salooshaba, dhaartii dambuu, 'KA BARO DUULIYENIMADA' buug la baxay, si Alla ugu dhigay midigta. Mise Ilaahay balankii waaba kuu tiriigga ku raadinayay, ee uu orod iyo ayaanba ku waayay! Lama arag ninkii, bas la yidhi. Way u ahaatay. Garbihiisaa laga duulay. Baalal buu yeeshay. farxad buu la kala batay. Qosolaan, ehayn qosol, oo kii waalida ah, ayaa siduu kadh-kadhluhu go'ay, laga soo wadaray. Wix, wixdii baa ka dhammaatay.

Jeer se wuxuu helelaystaba, aakhirutaankii buu johoreduu helay isla sii dhigay. Dheguhuu la sii nabay. Gegidii buu isagoo ka tuuraya, isa sii taagay. Dayuuradu sabaankaba, tabta qiiqa ugu meerayay buu gundhada jaray. Siduu buuggu yeel yidhiba, wuu yeelay. Suul-dhabaale dabadiina, bahashiiyoo, dabayl lagu misaalaa, diridii madoobayd, kala haw tidhi. Samaday iskula toshay. Isna si uu yahayba, ismuu garanayn. Sidi, sidi buu la miyir khaafay. Riyaaqii baa madax maray. Rayn-rayntiina, wuu la kala war-eegay.

Hadu se laba dewradood oo isku mataansan soo mariyay, ayuu saakinay. Sangaalihii baa ka soo dhacay. 'Haakah!' iyo 'Hadaan hooyaa!', ayuu ku daacagoodleeyay.

Aminkaasuu nabdiga, 'Kii dhul ahaa, nabar baad  
ka soo maqnayde, ku laabo, ' kaga tallamay. Buugii  
dhabta u saarraa, ayuu hoos u dhawray.

DHAMMAAD

DEGISTANA KA EEG BUUGGA LABAAD baa indh-  
aha muudsatay. Farba meel bay dhigtay!"

-IX-

Taasu xalay. Xantashiyo xusuus damaq leh baa ka soo meeray. Caawaa la joogaa. Gudcur deden iyo habeen dama weeye. Magan-gooyaa ku jimicsaday.

Sigedna waa balanbalkiisii. Garna wuu qaban la' yahay. Galab-galabta ayuun buu hayaa. Dareenkiisii baa ku huray. Hibashuu la galgalanayaa. Niyaddaa gubanaysa. Gocashuu hadba la ged-gadoomayaa. Xanaftiyo hurgumada hafeefta lehna, haluu fiidadowgii la yeedhay Shide Durdur baa ku nooleeyay.

Hadhadii Hengeshtiyo Lama-galaayday miinadu ku xeerayd bay ku habeensadeen. Hadalkuna, fartiyo boostaa is oge, "XAGGEE LAYNAGA HAYSTAA?" iyo "SIDEE LOO FURDAAMIYAA?" buu u dhacayay. Udub dhexaadkii-saa ahaa. Ninba garashadii ayuu doodayay.

Heegadana Ifisadu sideedii bay uga jala-butay-naysay. ~~Iyadaa~~ Iyadaa ku lahayd. Afarta bayna-jahaba way u dawaaraynaysay. Afkaa isku may darayn. Sida daacuflaha aar ayay u daloombiyaysay. Dalabkeeduna, "Aaway duulahaan, diray Ina habar dumaaleed ma dugsuu yaxoobaa?" ayuu intaaba ahaa.

La hubsayoo goroyo haad bay noqotay. Inana wax kale, ina ma hayaan. Ummad baynaan ahayn. Dun lay noo ma oga. Isma dhaantiyo dhasheed, iyo dugaagaa is cunaaya inoo daa! Allihii shanta kolkeenii horaba inoo saydhiyayna gar buu u lahaa. Sinji-dhaanimad-eenuu ogaa! Quraanna KU FURUN AXAD baa isku fuuq-satay. Innagiyo dusha calan la saariyo dawladnimana kala daa!", iyo sacabkoo uu isku dhufte, intuu Shide ku soo galsna miiray, ayuu wuxuu geesa wado, ama uu hawadiyaba, ku gole keenay, "Haddiyo habeenka ceawa shna, laba daw bay mid inoo joogtaa. Bahala higladaynu ahayn inaynu isaga dhuranno, aydiina dib ugu laabano, iyo inaynu gablankaba Nebi Aadan ~~kiix~~ ...

kii ka furtiyo isticmaarkii xaal u gayno, gadh-kiyo gombahana qabanno, oo ~~xx~~ aynu, "Duca qabe aad na kala ilaaliside kaalayoo dib noo qabso!" ku nidhaahno, inooga ma dhexayso!"

(4)

"Subxaan! Subxaan!", iyo madax oo uu gacanta kula yutu'o ayay Sigadna kaga gudhay. Nabar buu hoos u fooraray. Gelin aan yarayn iyo neef gur dabadii buuse, "Kugu ma hadhin, oo waad is dhiib-tay Shidow!", kula soo toosay gardaadka.

"Magacaad doonto ugu yeedh. Shalay iyo mala awaalkiise laga yimi. Runteedii baa Sigadow la hirdiyay. Anna eegay, oo eegayoo sidaa waxay ku dhaanto waan waayay. Ciricay eeday, eersatayoo ab-nadeed dhamac ku ramiyay baa haysta. Maraan-imaduna ku soo-boodo dhaw maaha. Waa ka sal. Arroor iyo asal bay ka tahay. Isir bay u leedahay. 'Darbi Caga-weyn waa mid dogonoo darka loo xidho wayska dumisaa!' candha beesheydii loogu heesay, iyo iyadu wax isna doorshaan. Macnaa darajo weeyaan. Waalwaalashaduna wax kale kama aha. Axan laga dhigu sida way u dhalayay. Laftay xadhig lara eitean, magaan sixran, iyo belo-ku-diday hor iyo daba diida ka tahay...."

"Ii kaadi! Cagta ii dhig Shidow! Amba Soomaali hadaynu nahay, in wax weyni si inaga yahay kugu na diidani. Jarniga lebaatanaadba qariib ayaynu ku nahay. Doolaalo inaynu ku nimi baa la moodaa. Ay saas tahay, hadana shoocaddu waa inaga dhalan, iyo isticmaar la'aan baynu la eedaadaynaaye, intay goori, goor tahay ergo inoogu dira, kollaba ma idhaahdeen!", intuu ku af-gobaadsaday, ayuu Sigad hakad yar gadaashii raaciyay, "Bal se sheekaba, sheekay keentaaye, doob guunkii geel-jire, kugu ma maakubine, sheekadii la reebay baan soo xasuustay....."

"Aadaa ku haystoo kaama gooyee, miyaan is mood-

siyay, oo waa dheerhawga, mise gariir baa jira?"

\_\_\_ "Waa gariir. Ma se dhawa. Aad buu u durugsan yahay oo carriga inoo ma laha."

\_\_\_ "Is idhi. Bal se waa tahaye, ka soco."

\_\_\_ "Ha la yeelee, wax la yidhi, doob gaamuray, oo geel u go'ay buu ahaa. Afartan ayuu jiray, kubkii-sana weli wayso muu marin. Gale geel mooyee gurina maalintuu baarka afar ka gooyay baa ugu dambaysay. Dhaayin buu se dhacashadeed, dhacaalaynteed, iyo dhacaigeedba yaqaanay. Dhan ayuu uga dhacay. Meel baa loo dhigay. Hal wayday niriigteedii oo uu yay ka gudhin yidhashdo, oo tu aanay dhalin uu ku tolo iyo miduu tuurin u qortaba caalin ayuu ku ahaa. Looma tilmaamayn. Sanac geel buu sheegtay. Farayntiina buuni looga dambeeyo ayuu ku ahaa. Tu dhali wayday oo uu tiire ku marayeeyay oo aan kolka ugu horaysee loo tu'iyoo la goojinna lama werin."

Uu sidaa yahay buu hadaba, salaad hore isagoo ceelalya ah oo ka tooraynaya si Alla, toobiyuhuu oudhquudinayay kaabiga reero ka degay ula kodlay. Baroor baa uga baxday. Wuu ku baydhay. Gabadh gur-yaha duleedkoodii, 'Balan-balayeeyda' ka haysa, oo la celcelinayo, dumarkii reerayawguna ku mashaqaysan yihiin ayuu mudh ku yidhi.

\_\_\_ "Sidee wax u jirsan? Gabadha se maxaa helay?", \*\* ayuu ku waraystay.

\_\_\_ "Qadar Alle!", iyo, "Wiilkay ku curatay baa lagala noqday, oo xalay u saqiiray!", ayaa loogu jawaabay.

Doob guunkiina haduu ammin isla macnaa, ayuu goor dambe intuu madaxa kor iyo hoos u gundhiyay ku guuxay, "HAAA...SIDA HASHII WEEYE OO WAA LA TOLAYAA!!!!"

\*\*\*

Sii ekaa Sigad. Budulkay hibashadu afka u saartay buu sidii u hayay. Tabaaluu kula dhiinaa. Tiirsanyadana wuu ku dhudhuminayay. Haddiyo eeggana kamuu hadhin. Horuu ugu sii dheeliyay. Toddobatan jir taasi godatayo, adduun ku tanaxweeyay tabnigii ayuu u qutubsaday. Damqashaa hageysay. Diilalyadana wuu ku tukubayay. Dayrkii habeenka se kunuu saakimin. Tabashaduu ku waydaartay. Kaggiyo wuxuu ~~xxxx~~ uga meeray gol-madhantii tafta rogatay.

Biddeed huurteyduna meel maadoon kunay x liqaansanayn. Kaabigayba, juuq-dhegaysi kula soo laamaanayd. Fooday ku soo haysay. Isaguna, fartaan meeshii bugta laga maadin karayne, daahii mugdiguu dib-u-mirashada xanuunka le iyo xantashada ku fayday. Mudh bay ku soo tidhi. Wejigana way isku dhufteen!!!

\*\*\* \*\*

Jeer horaa faralkii casar layska riday. Welise gol-casta kamuu jabin kulaylkii. Indhaba lama siin karayn. Gubadkana mus galbeedkay kaga caashaqnayd. Caashayba ku soo haysay.

"Fadalkii cadaa iyo faana-gurashadii loo ogaa ma lahee, mindhaa galabtana Col-joogaynka ayay ka war-qaadaysaa!" is yidhi Sigad. Xaggiyo Lama-galaay buu u sii tuur-dhalaashanaa. Caynkaa gubay. Cagtaa dalooshay. Dhafoorkana walbahaarku ka adeeg. Ciddi buu kula tegay. Nabdiguu ka toobnaa. Niyaddaa turqanayd. Tallaabadiisuna wagash, wagash ku liidata ayayba ahayd.

Dib-u-furashadeedii ayuu ku dhaawacmay. Nabar xaq-darraa se Ilaah uga dhigay. May jabine way jiidhaysay. Wuu ka kacay. Duumaa se la hiishatay diiftiisii. Dar wisiisigeediyo dabayshii xagaa bay ugu soo hullatay. Way soo ridatay. Dirqi iyo tu xun ayuu kaga doogay. Maarraha suntiisiyo micidii ~~kanee caduba~~ way ku maq



kaneecaduba way ku maqnaayeen.Waa se loo weh-  
eshay.Waana lagaga weynaa!

Ay sidea tahay, Sigadna uur-ku-taalede  
bukaan socod goshu tiicday uu yahay, dhaadkana,  
'Ka tag tala xumo  
u tag tala xumo  
waa tabteenee,  
Tafa-dhiigley  
misna tala xumo  
ma la taransaday!',uu ku sii rogayo ayaa lagu  
kadiyay.Qabar baa labada dulba kaga ururay.  
Madh-madh uray iyo maala-hoodh ontaray ayuu ka  
dul dhacay. ~~XX~~  
~~XX~~  
~~XX~~  
xxx Firgayoo kolkaa mas nin ku joogsaday sidii  
u bariiqay! Middigtuu markiiba la duulay.Sankiyo  
afkuu ku daabay.Wuu iskala malmalay.Docday be-  
laayadu ka soo'fah' lahayd mooyee dhankii kaluu  
isu dadbay.Cagtuu ka maalay.Cidhibtuu ku dhuftay.  
Kullubkeasuu margigana u sii duubay.Naftaa la diday!

Neef ka soo baxdana, bakhtigii fuurayee door-  
yaanku ku fatiigayay markuu ka dhammaaday baa  
ugu horaysay."Hoheey, hoh! Bannaf huuray miyay  
maqaadiirtu igu beegtay?! Hoheey, hoh! Fadara  
yuururtiyo ma afkaan hoodh faaray uga galay?!  
Cakuye meel baasta maxaa i soo mariyay?!" in-  
tuu ku hinraagay buu wuxu, wuxuu ahaa is wey-  
diiyay.Hubsiiinaa ugu dhinayd.Daymaduu amminkaa  
dib ugu sii halgaaday.

HaBa dayin lehaayaa!Indhahaa soo kuday.Ca-  
wro uguboo udbaheedi wadataa labadaba hadhsatay.  
Salkay dhigtay.Guruxuna saraayada inuu goonk-  
aba soo waydaartuu ku sigtay.

Balse il-fashaqa wuxuu la waabto indhaha,  
unuunkana hadba urugada uu la meer-meeriyaba,  
gelin dabadii buu muraara-dilaaca ku gurray,  
"Tu kalaba waan filayay!In badanoo la biciid-  
sadana wax dhen baan u soo joogay!Kollaba se

balanbaalis xayasha daruura iyo xaafuuni sida-  
 ata, oo siddeedii xarafoo saymo roob sideedii  
 u sinmay ku hooshaarsan, oo hadana duufkiyo  
 xumaystii dukhsiga la boobaysaad arki, ood u  
 soo qaladnaan ismaan odhan!"

Inuu se qumbacashada la huleelay aakhi-  
 rkii timi. Ka higliishi Sigad. Wuxuu ku tagaana  
 la tusaye, dareen hilgoobay, halasuhu ka soo  
 hoyday, haydaartuna soo kartay, oo ku damaqs-  
 anaaya, 'Haday arartuba

ugbaad iyo khoof  
 miduun irkatooy  
 aroor ku gasho,  
 odhaahda badh baa  
 dhegtaba awdoo  
 illinkaa maqalkiyo  
 Allow sahal kay  
 maraan erayadu  
 malaasa afka !

Arbaciin sanadood  
 ma eebe dhigtoo  
 abeeso tufkeedu  
 waa safee,  
 hadduu ayaxuna  
 sideed carra edeg  
 u sii dhigay eel  
 abkeed guba,  
 badh baa aragtida  
 indhaa garciyee  
 ayaan darridayda  
 eeggana  
 inteed ma ku sugay  
 alhumada!  
 Ayaan darridayda  
 eeggana  
 ishaydu ma eeday  
 eegmada !  
 Ayaan darridayda ~~XXXXXXXX~~  
 eeggana  
 ma eersaday  
 iimahaygii !

Ayaan darridayda  
eeggana  
ma ood rogay

aayahaygii !!!, laguna dhan yahay.  
oooy ka taalo dhulke, iyo dhagaag-joogsi buu  
ku sii jiitamay. Wakis bay lugtiisu ahayd. Saan-  
gaadkuna waarris. Waraabe, waraabayaal ka had-  
hay sidii ayuu u heetinayay. Gawaan cidla'a i-  
ntuu ciilkaambiga isla dhidbo ayuu hadba farta  
ka qaniinayay dhexda. Dhaawac-tiridiyo dheelim-  
ashadeeda kaarinayay. Dhul fog buu ka taahayay.  
Gabal kuna Lama-galaay iyo gola heer madow ayuu  
ugu dumay.

\*\*\*

Ifisadu wadheedii. Karaar bayba sii b-  
utaysatay. 'Lama ledo, Wailee lama ledo !' ayay  
heegada kula shareeran tahay. Wararaca dagaal-  
eed iyo wilwilay uga cadahay. Danan-kacayba ku  
galaydhinaysaa. Seeraaradana way ku daba-shab-  
eelinaysaa. Walaheeda ku raraa.

(7)

Ciin bayse ka daaqday Sigad. Ka-sidiina l-  
aba legdood iyo laxaw la koodhaadh bay u aha-  
yd. Nugulkuu ka figaysnaa. ~~X~~ ~~Xxxx~~ Abeeso isu  
dhiibkeeda is-dhaaf ugu tignaa. Garawshiiya  
la'aantuna ~~x~~ teelo umay dhigan. Daabkayba dib  
ugu celisay.

Waa sidaase hadaba hiyigu shaandho. Arami  
baa ku shacduurtay. Hami iyo qami baa ku wada  
shaxay. Farahay ka arooriyeen. Alliyoo haar ayuuba  
ahaa. Sideeduuna, 'Nabad baa la gam'aa

kolkaad goglatee  
goodaado colaad  
la gaamurtayoo  
gumaad ramataa  
ninkay laba gaws  
dhexdood gambidee  
gondaa dhigataa,  
galiilyo darteed  
hadduu galgashiyo  
hadduu gabi-dhaca

hadduu gabi-dhaca  
 la guur-guuraba  
 gartii weeyoo  
 ma huro goobyaal !

Gubtaanyoodaye  
 anaa gadawgiyo  
 sidiisa gilgila  
 gogiyoo haankoo  
 alayl gab yidhaaba  
 way gocashoo  
 good baa igu maran  
 gidaad caba !

Gammuun suna aar  
 la soo godanoo  
 gantaali ku taal  
 anaa la gadoo  
 kolkaan Lama gala  
 golxada dhigo  
 gūnaad ciriroo  
 gungume daaqiyo  
 Gubaa igu mira  
 gudoodiga !!! ugu gablaynayay.

Firgashuu habeenkuba u ahaa. Fiix baa uurka l-  
 oo dhigay.

Sidaa weeyee Alleylehe Sigad way faraqsa-  
 tay. Fakaloolku weete. Goon-dhabaale ku waal.  
 Gees-garaac fekerkuna. Basan-baas adduun baa  
 u dhammaaday. Baaxaa-deg iyo laba boglayn ayay  
 caawaba uga dhexaysay. Neef la gawracay baad  
 moodaysay.

. Bari guntii kolkuu oogga waaberi ka hinq-  
 adayna, qajeeluu dhinacyaynayay. Hooyaduba se  
 markay waydo ilmaha gosheedey ka daydaa. Tabn-  
 igeeduu isaguna ge'iyo labadiisa garab ugu f-  
 aeligayay, 'Naaladeediyo  
 inay noloshuba  
 nabad tahayoo,

( labadiisa kala guuran,  
 tolan taali )

nagaadi adduun  
naaf inuu yahay  
la'aanteed nabad,  
rag ninkii oqi  
~~XXXXXXXXXXXX~~  
naadinteediyo  
nidarka Ilaah  
naawilaadeed  
kama noogee  
aaway nabadii?

Naas walaalnimo  
aaway nayruus  
laga nuugaa?

Aaway neecaw  
nayaayira loo  
lagu neefsado?

Nuudhigeedaa  
lagu noolyee  
aaway NABADII ???'

→ Jawaabtooduna, "Wax la waayay geellow, ninkii  
waslan baw dada!" iyo "Waxaad noo ~~h~~ dhiibatay?"  
ayayba ahayd.

→ Jawaabtooduna, "Innagaas, laguud jee dagaal  
naca laha!" "Maayan iyo maalin dagaal maxaad  
ta tidhi?" iyo duudduud kala yaraan bang  
ka ahayd.